

Somali Glossary of Special Education Terminology

The purpose of this glossary is to assist Somali interpreters, translators and teachers so that they can provide more accurate interpretation of special education documents. Ultimately, we hope this will improve families' understanding of special education programs in Minnesota. For further information or to share suggestions for improvements to the glossary, please contact Elizabeth.Watkins@state.mn.us.

Ability:	Karti/awood: Kartida aad wax ku qaban kartid.
Above (average):	Ka sarreeya: Ka sarreeya isku celceliska
Above the norm:	Ka sarreeya caadiga: Ka sarreeya caadiga ama isku celceliska.
Abstract reasoning:	Kartida lagu xalin karo arrimaha la xiriira aaraada maldahan iyadoo la isticmaalayo maskaxda (indhaha iyo gacmaha lama adeegsanayo).
Academic ability:	Karti aqooneed ku saabsan wax qorista, akhrinta, ka shaqeynta xisaabta iyo xirfadaha kale ee la xiriira ee looga baahanyahey dugsiyada.
Accommodation:	Waafajin: Isbedalo yar-yar oo lagu sameeyo maaddada ama imtixaanka kaas oo aan fududeyneyn imtixaanka. Tusaale ahaan, ardeyda caadiga ahi waxay ku xaliyaan 50 su'aalood waqti 5 daqiiqo ah. Waa inay akhriyaan su'aasha qoraanna jawaaba. Haddi ardeygu naafo yahey waxna qori karin, IEP-gu waxaa uu dhihi karaa, "Ducaale waxa uu 50 su'aalood oo xisaab ah ku xallinayaa 5 daqiiqo, isaga oo akhriyaya, jawaabtana baraha afka uga sheegaya."
Achievement domain:	Fahmada maskaxda: Goobaha qiimeynta ee la xiriira akhriska, qoraalka iyo xisaabta.
Acting out:	Istusid, arbushid: Daf-daf ama dabecad wax qas ah.
Acute (adjective):	Aad u culus ama u adag: Waxay tilmaameysaa dhibaato si deg-deg ah u billaabatey oo u baahan in si ded-deg ah wax looga qabto.
Adaptation (noun), adapt (verb):	La qabsi/ la qabsasho: Waa isbedel loo sameeyo ilmaha naafada ah si ay ugu fududaato in uu ka qeyb galo waxbarashada.
Adaptive behavior:	Dabecad la qabsi leh: Kartida qofku isku daryeeli karo ee la xidhiidha qubeysiga, musqul galista, cunto diyaarinta, maamulka lacagta iwm.
Adaptive physical education:	Fududeynta jimicsiga: Waa hab jimicsi ama ciyaar loogu talo galey carruurta naafada ah, waafaqsanna kartidooda xadidan.
Advocate:	Afhayeen, u doode: Qofka u hadla qof kale una gargaaraya, waalidku waxaa uu u yeeran karaa qof u hadla oo uga qeyb gala shirarka ubadkooda.
Affect:	Saameyn: Dareen ama caadifad.
Affective disorder:	linta la xidhiida xaga fahmada: Wax qabid la xiriira qofka dareenkiisa iyo heerka xirfadiisa.

Age equivalent:	La fil ah/fil u dhig/la fac ah: Waa hab la isu barbar dhigayo da'da ardeyda iyo heerka xirfadooda.
Aide:	Kaaliye: Waxaa ay la mid tahey kaaliye xirfadeed ama kaaliye bare.
Amplification (noun), amplify (verb):	Cod baahiye: Kor ugu qaadista codka si ardeyda dhagaha culus ay u maqlaan.
American Sign Language (ASL):	Afka midaarka ee Maraykanka: Waa luqad ka mid ah luqadaha ugu caansan ee lagula hadlo dhagoolayaash- luqadani waxaay ka koobantahey calaamado la iskugeeyey. Luqadan naxwaheedu wuxuu aad uga duwanyahey luqada Ingiriiska ee lagu hadlo waana luqad gaar ah.
Anger management:	Isceilinta marka la xanaaqo: Qof kastaaba mar mar buu xanaaqaa. Lakiin ilmaha naafada ahi marka uu xanaaqo waxaa laga yaaba in uuna cadeysan karin xanaaqiisa. Tusaale ahaan, waxaa laga yaaba in iyadu/isagu uu ilmakale wax ku dhufto amm ay wax jajabiyaan. hadaba isceilita marka laxanaaqo macnaheedu waa in qofku isgarankaraa oo isamri karaa si uu u yareeyo wax yeelada xanaaqa keeni karo.
Antecedent:	Ka hor dhac: Waa wax keena wax mar dhacey. Ama wax sababa wax dhacey
Anxiety disorder:	Sasmo (bayr): Waa nooc ka mid ah ciladaha caafimaadka dhimirka laguna tilmaansado ka didmada khataraha dhabta ah ee ku soo fool leh amma wuxuu khatar u haysto.
Area of weakness:	Gol daloolo: Xirfada iyo wax qabadka uu ardeygu dhibato kala kulmo. Tusaale " ducaale dibtiisu waa akhriska.
Area of strength:	Meesha uu ku fiicanyahey: Xirfadaha ama waxqabadka ardeygu ku horreeyo. Tusaale "ducaale xisaabta ayuu ku fiicanyahey".
Articulation:	Qeexitaan/aragti si fiican u gudbin: Hadli ogi. Aftahannimo.
Asperger's Syndrome: Assessment:	Fiiri agnaanta ama damiinimada Qiimeyn: Qiimeyn ama imtixaanid.
Assessment instrument:	Qalabka qiimeynta: Qalabka wax lagu qiimeeyo ama imtixaanka taxan.
Assessment procedures:	Hannaanka qiimeynta: Waa si ka ballaaran siyaabaha caadiga ah. Hannaanka qiimeynta waxaa ku jira cilmi baaris iyo wax kale.
Assessment summary report:	Warbixin qiimeyn kooban: Waa warbixin kooban

Assistive technology:	Tiknoolojiyada/qalabka casriga ah oo wax kaaba: Qalabka ama makiinadaha kaalmeeya dadka naafada ah si ay u qataan nolol maalmoodkooda sida konbuutarka codka garta.
Attention deficit hyperactivity disorder ADHD):	Dhug la'aan sal fudeyd leh: waa cudur ilmaha ka celiya in uu dugsiga ama gurigaba si xasilan u fadhiyo ama ku nagaado iyada oo ay ku xirantahey ilmaha da'diisa marka loo ee go
Attorney:	Qareen/u doode: Waa gar yaqaan sharciga adeegsada, dadka badanaa waxaa matala dhageysiyada (maxkamadaha) qareen sharciga wakiil uga ah.
Audiologist:	Maqal haye: khabiir ku xeel dheer cabiridda maqalka (beegi kara codka cunugu maqli karo)
Auditory discrimination:	Maqal sooc: kartida codadka cayn cayn loogu kala sooci karo.
Auditory memory:	Maqal xusuuseed: Kartida xusuusta war la maqley.
Auditory processing:	Habeynta maqlida: Kartida (awood maqal, fahmid, iyo xusuusta hadal la yiri.
Auditory sequencing:	Maqal kala hormarinta: Sida uu maqalku isugu xigo ama sida loo maqley hadalka.
Augmentative communication:	Xiriir kaabe/xiriir kor uqaade: Waa tibaax guud oo lagu qeexo, aaladaha iyo qalab kala duwan oo loo adeegsado si loo gargaaro dadka aan hadlikarin.
Authorized district employees, authorized personnel:	Shaqaalaha idman ee degmada: Dadka shaqaalaha dugsiga oo u idman inay akhriyaan xogaha dhawran ee ardeyda.
Autism (noun), Autism Spectrum Disorders, autistic (adjective):	Agnaanimu/qiyaasta cilada agnaanimu: Dadka leh agnaanta ama damiininimada waxaay leeyiin cilado daran oo hadeeq iyo(hadal iyo hadaaq la ee xiriir
Average:	Isku celcelis: Wa hab loo helo isku celceliska koox (waxaa la isku daraa dhammaan dhibcaha).
Background noise:	Buuq/yoona/shanqar duleed: Saqadhaha u dhaca si dabeeeci ah ama si lama filaan ah (jabaqda albaab laxiray ama dayuurad dibadda duuleysa iyo ay ciyey waa muhiim
Baseline:	Xariiq saleed: Ama barta bilowga - tusaale ahaan barayaasu waxaa ay qaadaan imtixaan xilliga deyrta midna waxaa ay qaadaan xilliga guga, si ay isugu barbar dhigaan. Imtixaanka deyrta waxaa la yidhaahdaa xariiq saleed.
Behavior:	Dabeecad: Guud ahaan wax kasta oo ardeygu falo oo la hubin karo.

Behavior contract:	Heshiis dhaqameed/akhlaaqeed/dabeecadeed: Heshiis lala galo ardeyga oo ku saabsan waxyaabaha uu dabeecad ahaan falo, si loo hubiyo in uu dabeecaddiisii hore wax kabadelo. Tusaale, waxaa laga yaabaa in heshiisku uu dhigayo "Caasho waxay heli doontaa 10 dhibcood haddii ay kursigeeda ku xasisho oo ay dhameeyso dhammaan shaqadeeda waxbarasho, taas oo ay ku hanan doonto in ay ka qeyb gasho raxlada soo socota. Hadiise ay macalimiintu caawiso ama ay ka kacdo kursigeeda waxaa ay heli doontaa 5 dhibcood, qorshaha nooca oo kale ah waxaa la yidhaahdaa "heshiis" badana ardeyga ayaa saxeexa si uu u fuliyo iyada oo waalidkuna lasaxiixayo marmaka qaarkood.
Behavior domain, behavior ability:	Hannaan dabeecad/karti dabeeco: Dabeecadda wanaagsani waxaa ay ku xidhantahey sida ay xaaladu tahey, si loo maareeyo qofka dabeecadiisa.
Behavior intervention:	Wax ka qabasho dabeecadeed: Waa wax la sameeyo si looga hortago in dabeecad xumo yari ay sababto wax weyn. Ama in laga hortago dabeecada xumi inta aaney bilaban.
Behavior modification:	Dabeecad doorin: waa hab hanaansan oo lagu dooriyo sida uu ardey u dhaqmo.
Behavior plan:	Qorshe dabeecadda ku saabsan: Waa qorshe loogu talagaley in wax lagagabadalo dabeecada ardeyga; waa qeyb ka mid ah IEP-ga.
Below average:	Ka hooseeya isku celceliska: Aan sidaas u fiicneyn sida ay ardeydu u badantahey.
Below the norm:	Sida caadiga ah ka hooseeya marka la isku celceliyo.
Behind:	Dib u dhicid: Ardeyda kale ka dambeeya.
Birth defect:	Xanuun/jirro ku dhashey: Waa jirro xaga caafimaadka ah ama xaga koritaanka ah oo uu qofku ku dhasho ama ku dhacdey qofka markii uu dhalanayey.
Blind:	Indhoole: Waa qof aan waxba arki Karin (waa Indhoole)

Borderline:	Xariiq soohdimeed: Juqraafi ahaan wadamadu waxaa ay leyihiin xadad u dhaxeeya. Waxbarashada gaarka ah xadku waxaa macnihiisu yahey in ilmuhu u dhaxeeyo meesha ay ardeyda u baahan waxbarashada gaarka ah iyo kuwa aan u baahneyni ay ku kala go'aan. Tusaale ahaan, qiyaasta rasmiga ah ee dhibcaha looga baahanyahey MMI waa 70 ee imtixaanka kartida maskaxfurnaanta, haddii uu ilmuhu keenu 72 ama 73 waxaa la dhihi karaa in ilmuhu uu taaganyahey xadkii.
Brace:	Joog kabe: Waa qalab caafimaad oo dadku dexda ku xiraan si uu uga caawiyo in qofku istaago lugahiisa iyo dhabarkiisana uu u xajiyo.
Braille:	Hab wax akhris: waa hab wax akhris oo loogu tala galey dadka indhoolayaasha ah si ay wax ugu akhriyaan.
Capacity, capability (noun):	Baaxada, awoodda, kartida: Baaxada ama kartida aad wax u leedahay.
Capable (adjective):	Awooda; kara
Case manager:	Maamulaha arrin arday: Qofka guud ahaan mas'uulka ka ah barnaamijka ardeyga waxbarashadiisa gaarka ah.
Cerebral palsy:	Duud qallal/dhabar qallal: Waa qallal ama suuxdin lagu tilmaamo oo ay weheliso tabardarro, isku xirnaansho la'aan, iyo murqaha oo tamarta gabey; oo ay sababtey cillad ku timid maskaxda markii uu ilmuhu dhalanayey ama markii uu ilmuhuu uurka ku jirey
Civil court, civil action, judicial action:	Maxkamad rayad (shacab)/tallaabo sharci: Haddii uu qofku ku qanci waayo dhageysiga natiijada maxkamadda madaniga ah ee waxbarashada gaarka ah, waxaa uu codsan karaa in dacwadiisa ay qaaddo xukun guurtiyeed oo loo yaqaan maxkamadda madaniga ah.
Classify (verb), classification (noun):	Kala saarid: Waa hanaanka lagu go'aaminayo nooca naafada ee uu qabo ardeygu. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in ardeyga lugu qeexey in uu qabo nooca naafada ee loo yaqaan SLD", ama " in ilmaha lagu caddeeyey in lagu qeexo nooca naafada ee loo yaqaan SLD".
Cleft palate:	Faruur: Waa dilaaca faruurta sare oo uu qofku ku dhasho. Waxaa ay hoos u dhigtaa awoodda uu ilmuhu naaska hooyadii ku nuugo, cunitaanka iyo hadalka. Faruureyga waa la sixi karaa iyada oon ilmaha la qalayo.

Clinical psychologist:	Dhakhtarka dhimirka: Waa dhakhtarka ka shaqeeya goobta daaweynta.
Close-ended task:	Arrin kooban: Waa waxbarasho ay jawaabteedu cayimantahey oo leh meel ay ka bilaabato iyo meel ay ku dhamaato. Tusaale ahaan, jawaabta saxda ah ee iskudhufashadu 5 waa mid xiran oo cayiman.
Cognitive impairment:	Garasho dhiman: Waa erey kale oo ay leedahey dhimirku ama cudurada maskaxdu.
Communication ability:	Awooda kartida lagu wada xiriido: kartida lagu wada xiriiro hadaaq ahaan iyo hadaaq la'aanba.
Communication board:	Qalab gargaara mayeedhaha: Waa qalab loogu tala galey inuu gargaaro mayeedhaha - tusaale ahaan waxaa laga yaabaa in sawirro uu tilmaaamo ardeygu si uu u muujiyo waxa uu doonayo ama ay dooneyso. Waxaa kaloo ardeygu uu isticmaali karaa combiyuutarka isaga oo gujinaya calaamadaha botonada makiinadda kombiyuutarka.
Competence (noun), competent (adj), competency (noun):	Karti leh/ awood leh: Waxaa ay la mid tahay sida awoodda iyo kartida. Waxaa kale oo ay tix raaceysa awoodda kartida go'aan qaadashada. Tusaale ahaan, waalidka ilmaha 18 jirka ah ee qaba aafada garasho la'aanta waxaa laga yaabaa in ay ku andacoodaan in wiilkoodu aanu kaligiis lacagta maamulan karin amma uuna kaligi noolaan karin. Marka tani oo kale ay dhacdo, waxaa laga yaabaa in ay maxkamadda tagaan si ay qaadiga u weydiiyaan in uu u cadeeyo in uu ilmahoodu sharci ahaan yahey mid dhiman iyo inuu u magacaabo in waalidku ay sharci ahaan mas'uul ka yihiin wiilkooda (caadi ahaa marka ilmuhu gaaro 18 sano waxaa lagu xisaabiyaa in uu qof weyn yahey)
Compensate (v):	Soo badid/mag dhabid ku kabid ama soobuuxin: Tusaale ahaan, waxaan muraayadaheyga indhaha u xidhanahey si aan u kaabo (hagaajiyo) arageyga. Sida qaar kamid ah dhagoolayaashu waxa ay akhriyaan dhaqdhaqaaqa faruuryaha qofka hadlaya si ay u caawiyaan (kaabaan) dhago la'aantooda.
Compensatory skill:	Xirfadaha kaabitaanka (baditaanka): Ogow (compensation) waxay la xiriirtaa mushaharka ama lacagta!
Complaint:	Cabasho: Cabasho ku aadan waxbarashada gaarka ah, cabashaduna waxaa ay tahay qoraal.
Complainant:	Cowdaha: qofka cabanaya/andacoonaya.

Complaint investigator:	Baadhaha cabashada: Waa qof ka tirsan qeybta Minnesota u qaabilsan caruurta, qoysaaka & waxbarashada kaas oo ururiya warbixinta cabashadu marka ay diiwaan gasho. Hadii baaraha cabashadu uu cabashada ku raaco in uu dugsigu jabiyey xeeqa iyo qaanuunka waxbarashada qasabka ah waxaa uu/ay amood u leeyahay/leedahey in ay ku khasabto dugsigu in uu si deg-deg ah u saxao xaalada amma arinta.
Complex directions:	Farriin wajiyo badan: Waa marka qofka la faro dhawr farriimood oo isku mar ah oo la doonayo in qofku uu wada qabto.
Complaint behavior:	Dabeecad cabasho: Dabeecadda cawduhu waxaa uu raacay sharciga iyo tilmaamaha u yaal fasalka.
Concern, area of concern:	Dareen/arrimo dareen laga muujiyay: Waxaa ay la mid tahay meelaha uu ardeygu ku liito ama u tabar daranyahey.
Conciliation, conciliation conference:	Heshiisiin/dhex dhexaadin: Waa shir ay wada qabteen waalidka iyo waxbarashadda gobalku si ay iskugu dayaan in ay dhex dhexaadiyaan khilaaf. Shirkan kuma jiro qof dhexdhexaadiya ahi, ama afhayeen ahi, ama xaakim ahi. Haddii ay u suurta gali weydo in ay gaaraan heshiis markaas ayaa laga yaabaa in loo gudbiyo hawsha in ay iskood isku dhexdhexaadiyaan ama ay maxkamadi ay dhageysato.
Conduct disorder:	Anshax xumo: Waa dabeecad ama dhaqan xumo uu ardeygu kujabinayo xeerka bulshada oo uuna awood uu isku ilaaliyo laheyn
Confidential information, confidential data, confidentiality:	War aan cidna lala wadaagaynin/macluumaad sir ah: Waa warbixin gaar ah oo ay xaq u leeyihiin inay ogaadaan qofka leh iyo inta ay khuseyso kaliya. Warbixinta waxbarashada gaarka ah waxa arki kara oo kaliya shaqaalaha waxbarashada iyo waalidka ardeyga iyo turjumaanada o kaliya. Lama oggola in shaqaalaha waxbarashadu ay la wadaagaan xogta ardeyda cid kale oo aan shaqo ku laheyn.
Conflict resolution:	Xalin xurguf (khilaaf): Waa is afgarasho u dhexaysa laba dhinac. Guud ahaan waxbarashada gaarka ah, is afgarashadan waxay dhacdaa marka ay waalidka iyo waxbarashada gobalku ay ku heshiin waayaan in ay isla meel dhigaan sidii ay u go'aamin lahaayeen ardeyga laxaad gabkiisa awooddiisa garasho.
Congenital:	Cillad: Waa iin ama cillad uu ilmuhu ku dhasho. Cillada waxaa laga yaabaa in uu ilmuhu ka dhaxlo waalidkii ama ay ku timaado marka u ilmuhu uurka

hooyadii ku jiro.

Consent, written consent:	Qoraal oggolaansho: Waa qoraal oggolaansho ay waalidku uu siinayo dugsiga in ay wax sameyn karaan ama ay arrin fulin karaan. Sharciyada waxbarashada gaarka ay ayaa waxaa ay dhigayaan in uu waalidku rukhsad u siiyo dugsiyada inay ardeygooda ka qaadi karaan tijaabo ay ku eegayaan ilmaha awooddiisa garasho ama wax qabad. Arrintan macnaheedu waxaa uu yahey in uu waalidku fahamsanyahey waxa looga jeedo in uu oggolaansho bixiyo.
Consequence:	Cidhib dambeed/ciqaabta ku haboon: Ardeyga waxa uu muteysan karaa ciqaab u dhiganta waxaa uu sameeyey, sida inuu nadiifindoono haddii uu wax wasakheeyo.
Consultant:	Lataliye: Waa xirfad yaqaan gaar ahaan ku takhasusey maaddo oo yimaadda dugsiyada si uu ula taliyo macallimiinta. Si toos ahna ulama xiriirto ardeyda.
Coop (short for cooperative):	Eray la gaabiyay: Waa eray la soo gaabiyey oo loola jeedo (cooperative) iskaashato ay dhawr waxbarasho degmo ay iska kaashan lahaayeen in wax barashada gaarka ah ee degmooyinka yaryari uga kaashan lahaayeen kuwa waaweyn.
Counselor:	Lataliye: Waa lataliye arday. Waxay ardayda ka caawiyaan fasalka ay qaadanayaan. Kuwii dhibaato kale lehna way kaalmeeyaan. Ardeyda ayey toos ula shaqeeyaan.
Criteria:	Qaacido/cabirka wax lagu saleeyo: Waa qaacido ama qiyaas lagu cabiro walax. Marka loo eego xagga waxbarashada gaarka ah waa qiyaasta lagu qeexo inta ay iintu le'egtahey qofka.
Criterion-referenced test:	Layli tix raac qaacido leh: Imtixan ama layli sal qaacido leh oo sheega wax ardey qabto oo aan loo eegi karin ardey kale. Imtixaanka MBST Ardeydu Minnesota fasalka 8-aad ayey ku galaan wuxuuna cabbiraa xirfadaha asaasiga ah, waana layli sal qaacido leh.
Curriculum-based assessment (CBA), curriculum-based measurements (CBM):	Qiimeyn ku salaysan manaahijta. Waa layli ama imtixaan ku salaysan qalab waxbarasho dugsiyeed iyo kutubta ama qorraalada: waxa ay tustaa in uu ardeygu fahmey ama bartey waxa uu baruhu u dhigey ama uu tusey. Waxaa kale oo ay isbarbar dhigtaa ardeyda.

Data:	War, xog, macluumaad: Xog la kaydiyo.
Day treatment:	Maalin dhaqan celin/maalin daawayn: Waa barnaamij ardeyda ka caawiya dareenka iyo dabeecad darrida. Ardeygu waxaa uu barnaamijka ka qeyb galayaa maalintii, habeenkiina waxaa uu tagayaa gurigiisa.
Deaf:	Dhagool: Waa qof aan wax maqli karin. Ama wax yar maqli kara.
Deaf-blind:	Dhaga la'an iyo indha la'aan: Waa qof aan waxna maqlin waxna arkin
Decibel:	Maqal cabir: Wa qiyaasta lagu cabiro maqalka.
Decoding:	Higaadin: Waa dariiqada xarfaha loogu dhawaaqo. Ardeydu waxaa ay isku dayaan in ay akhriyaan xarfaha iyaga oo kalmadda macnaheeda fahmaya.
Decrease:	Dhimis: Karti sii yaraaneysa.
Deficient, deficiency, deficit:	Naaqusid: Hoos u dhac, dhinnaansho, shaqadii ardeyda laga rabey oo dhinnaata.
Depressed (adjective), depression (noun):	Murugaysan/niyad jabsan/cadaadsan (sifo) cadaadis (magac): Nooc cillad gaar ah, laguna asteeyo heerka tamarta oo hoos u dhaca, dareen taageero la'aan.
Development:	Hormar: Wax barashada gaarka ah waxaa ay ku saabsantahey ilmaha koritaankiisa xaga jirka iyo maskaxda.
Developmental age:	Xilliga korriinka: Xilliga ilmuhu uu korayo - waa habkale oo ilmaha la isku barbar dhigi karo si loo ogaado xirfadaha ilmuhu uu ku hanankaro muddo. Tusaale ahaan, ilmaha 6 jirka ah ee naafada ahi waxaa uu yeelan karaa koritaanka maskaxda ee ilmaha sannad jirka ah
Developmental Cognitive Disorder (DCD):	Hormar maskaxeed xumo: Waxaa uu gobolku magacan u isticmaalaa si ay u qeexaan naafada meesha ay ilmaha waxgarashadiisu ay aadka ugu hooseyso ama mushkilada ka hortaagan in ilmuhu uu nolol maalmeed kiisa fushado.
Developmental delay:	Dib u dhac koritaan: Waa dib u dhac ku yimadda ilmaha - wuuxuuna ilmaha ugu yimaaddaa laba siyaabood (xagga socodka iyo xagga hadalka).
Developmental milestone:	Heerarka koritaanka ilmaha: Ilmuhu waxaa uu maraa heerar kala duwan marka uu korayo. Tusaale ahaan ilmuhu 3 bilood wey ku gurguurtaan, 9 biloodna wey ku istaagaan, 2 jirkoodana ilaa 3 kalmadood bey ku dhawaaqaan. Waalidiinta iyo dakhtarraduuba wey ka wal walaan ilmaha haddii ay ka waayaan heeraraka kala duwan ee ilmaha. Haddii uu sameyn waayo

horumar waxaa ay is dhahaan malaha ilmuhu waa laxaad gab.

Developmental/adaptive physical education (DAPE): Deviation, Standard deviation:	Koritaanka iyo laqabsiga: Koritaanka iyo laqabsashada jirka uu laqabsanayo ciyaaraha jimicsiga. Kadhaca, kaduwan, kaweeesan/seegitaanka heerka larabey: Haddii ardeydu ay qaataan imtixaan dhamaantood waxaan ogahey inay dhibco kala duwan keenayan. Sidaa darteed waxaa loogu talagaley isku cilcelis ahaan inta ku dhacdey. Tusaale ahaan, haddii aan soo qaadanno 2/3 oo ka mid 15-kii ardeyey imtixaanka qaadatey waxaa laga yabaa in Weecsanaan/duwanaan/kaduwan sida caadiga ah: ay ka hooseeyaan ama ka sareeyaan celcelis ahaan. Taas macnaheedu waxaa ay tahey n 15 ardeyba uu 1 ardey ka hooseeyo ama ka sareeyo dhexdhexaadka. Waxaa loo qoraa sida + 1 SD ama -1SD) imtixaan kale, 2/3 oo ardeydii imtixanka gashey ayaaba heley 10 dhibcood marka la iskucelceliyo. Tan macnaheedu waxaa weeyaan in 10-kii ardeyba uu hal ardey dhacey.
Diagnose:	Daawayn/baaritaan: Daawayn iyo baaritaan lagu baarayo waxaa cileda keeney.
Diagnostic teaching:	Daawayn iyo baritaan: Waa dariiqad lagu baarayo waxa cusub ee uu ardey bartey, laguna eegayo sida ay u barten. Waxaa sidan loo sameeyaa si loo helo habka ugu habboon ee ardeyga wax lagu bari karo.
Diagnostic test:	Layli daawayn/imtixaan daawayn: Waa imtixaan ama tijaabo loogo tala galey in lagu ogaado waxa ardeygu yaqaanno iyo in lagu ogaado sida ugu habboon ee ardeyga wax lagu bari karo. Tijaabadani waxaa ay ka duwantahey layliyada qeexa ama lagu ogaado heerka naafada.
Dialect:	Af guri/lahjo: Waa isbadalka dhawaaqa lugada ku yimaadda marka meelo kala duwan lagagahadlo ama dhawaaqyada kala duwan ee luqadi leedahey.
Disability (noun), disabled (adj):	Nafo (magac), Nafo ah (magac kaabe): Waa marka qofku aanu awoodi karin shaqo ama wax qofka caadiga ahi uu sameyn karo.

Disability category:	Astameynta naafada ama noocyada naafada: Waa nooc ka mid ah naafada sida ku qeexan heerarka naafada ee sharciga dawladda dhexe iyo ta fadaraaliga ah.
Disciplinary action:	Tallaabo Edbin: Waa tallaabo qaadis loogu talo galey in lagu ciqaabo ardey jabiyeey xeerka dugsiga. Dugsiyadu waxaa ay leeyihiin xeer ciqaabeed oo qoran looguna talo galey in lagu qaado heerka ciqaabta hadii u ardey jabiyo xeerarka mid ka mid ah.
Distractable:	Maahsan: Arday aan dhug laheyn ama la duufsan karo.
Discrepancy:	Farqiga u dhexeeya/Khilaaf: Kala duwanaansho laba tiro oo xisaab ah ama natiijo imtixaan.
Discriminate (verb), discrimination (noun):	Takoor (fal), takooris (magac): Ku takooris midab ama qolo, iwm. Waxbarashada gaarka ah waxaa loo adeegtaa maqal sooc, arag sooc.
Dispute:	Muran: Waa muranka ka dhaca waalidka iyo dugsiga waxbarashadiisa gaarka ah.
District representative:	Xubnaha wakiillada waxbarashada degmada: Hawl wadeenka gaarka ama maamulaha dugsiga ayaa noqon kara.
Domain assessment:	Qiimynta takhasuska: Takhasus ama xirfadda la qiimeynaayo.
Dominant language:	Afka loo badan yahay/Luqada qaalibka ah: Luqada dadka intooda badani ku hadlaan ama luqada loo badanyahey in lagu hadlo.
Down's syndrome:	Aafada Down: Aafo ama cillad la iska dhaxlo oo sababa in murquhu qofka laxaad gabaan, qaabka wajiga oo aan caadi aheyn, ama garasho gaabni iyo waxyaabo kale oo ku dhici kara qeybaha kale ee jirku ka kooban yahey oo aan sida qofka caadiga ah u sameysneyn.
Due process:	Habraac sharci: Distoorka mareykanka habraciisa sharci ahaan. Xuquuqda qofka waxa kaliya oo lagaga qaadi karaa habraaca sharciga oo kaliya. Nooca habraaca sharcigu waxa uu ku dhisanyahy marba xaaladu sida ay tahey. Xeer ciqaabeedka eedaaysanayaasha waxaa qoynkara guurtida loo sheegey danbigiisa. Eedeysanayaasha waxaa ay xaq u leeyihiin in loo sheego sababta kaliftey xadhigooda.

Due process hearing:	Dhageysi habraac sharci: Dhageysigan waxaa uu la mid yahey ka maxkamadda madaniga ahi ay ku qaaddo dhageysiga marka uu qof muwaadin ahi uu rumeysanyahey in hey'ad ka mid ah hey'adaha dowladdu (sida dugsiyada dowladda) aaney u raacin si habsami ah qodobada sharciga ama qaanuunka u qoran. Dhageysiga dacwada waxaa qaadaya xaakim ama sarkaal u qaabilsan maxkamadda dhageysiga dacwadaha. Dhinackasta oo ay dacwadu khuseyso waxaa uu soo jeedinayaa warbixintiisa iyo caddeynta waxa uu ku doodayo. Tani ma aha garsoor wadareed ama loogu yeerey guurto. Waxbarashada gaaraka ah "dhageysiga habraaca shariciga" waxaa laqaban karaa marka uu waalid ama dugsi dagmo uu dareemo in xuquuqda habraaca sharciga lagu xad gudbey ama xeerka la jabiyey. Sarkaalka dhageysiga maxkamadda qaabilsan ama xaakimku waxaa uu go'aaminayaa dhinaca saxda ah.
Due process hearing proceedings:	Qaabka dhagaysiga habraaca sharciga: Qoraalka diiwaangasha hadalka la yiri marka dhageysiga habraaca sharcigu uu dhacayo.
Dyslexia:	Nooc damiinimo (fahmo darro) ah: Waa nooc ka mid ah damiinimada oo qofku uu kala wareejiyo xarfaha iyo lambarrada.
Early intervention service:	Adeegga hor u billaabidda dhexdhexaadinta: Adeegga horraan toosinta/saxidda waa adeeg loo qabto carruurta iyo dhallaanka naafada ah. Adeegyadan waxaa laqaban karaa markay dhashaan carruurtu. Waxay cilmi-baaristu caddeysey inay ardey badani ay ku fiicnaadaan dugsiyada marka adeegga gaarka ah hore loogu billaabo carruurtu marka ay aadka u yaryaryihiin.
ECSU (Educational Cooperative Service Unit):	Xubinta iskaashiga adeegga waxbarashada (ECSU): Magacan waxaa loo bixiyey hey'adaha gobolka ee caawiya degmooyinka yar-yar.
Educational assistant (EA):	Kaaliye: Kaaliye waxbarasho.
Educational setting:	Madaha waxbarashada: Waa meesha uu ardeyga naafada ahi uu fasalada ku qaato ama uu ka helo baanta iyo hawlaha kale ee uu u baahanyahey.
Eligibility criteria:	Qaaciidada u qalnaanshaha, hal beegga xeeran: Waa xeerar uu qaranku dajiyey si loogu qeexo cidda u qalanta in ay hesho adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Emotional/behavioral disorders (E/DB):	Dabeecad qalqaalnimo wadata: Tibaaxa qeexidda ardeyda cilladaha garaadka ama dhibaato ka heysato xagga maskaxda, amaba qaba dabeecado xun-xun oo xagga akhlaaqda ah taas oo dhibaato u keeni karta in sidii ay wax uga baran lahaayeen dugsiyada amaba ay ula dhaqmi lahaayeen dadka kale.
English Language Learner (ELL):	Barashada Afka Ingiriiska: Magacaan waxay dugsiyadu u isticmaalaan ardeyda Afka Ingiriiska u barta inuu luqadoodii labaad noqdo oo iyagu Af kale ku hadla.
Environmental print:	Qoraalka (astaamaha) kugu wareegsan: Erayada ama xurufaha qoran ee inagu xeersan, sida calaamadaha kuqoran tabbeellooyinka, darbiyada, iyo kuwa cuntada ku qoran, iwm. Ardeydu wax badan ayey ka barankaraan akhriska ay akhriyaan qoraalladaas kaliya.
Epilepsy:	Cudur Maskaxeed: Waa cudur xagga maskaxda ku dhaca oo suuxitaan sababa.
Error:	Gef/khalad: Sameyn khalad ama gefka ardeygu sameeyo marka uu imtixaanka galo, ama jawaab khalad ah bixiyo.
Evaluation:	Qiimeyn: Waxbarashada gaarka ah laba siyood ayaa la sameeyaa. Mid waa qiimeynta qorshaha (barnaamijka), war ururin (tix-raac) lagu eegayo in wax hagaagsanyihiin iyo in kale. Qiimeynta waxbarashada ama qiimeynta qofka waxaa ay lamcnatahey imtixaano lagu eegayo waxa uu ardeygu fahmey ama uu qabtay. waa dreeqad lagu ururinayo macluumaad ku saabsan ardeyga iyada oo lakaashanayo dariiqadooyin kala duwan si loo ogaado meesha uu ardeygu ku xooganyahey iyo meesha uu ku liito iyo si loo go'aamiyo in uu ardeygu qabo/qabto naafo iyo in kale.
Evaluation Summary Report:	Warbixinta kooban ee qiimeynta: Waxaad eegta warbixinta imtixaanka kooban.
Examiner:	Imtixaame: Qofka imtixaanka qaadaya ama tijaabada qaadaya.
Expressive language:	Af/Luqad tibaaxan: Kartida aad luqada ku adeegsan kartid oo aad ra'yi ku dhiiban kartid.
Expressive vocabulary:	Erayada tibaaxan: Kalmadaha ama weedhaha uu ardeygu dhaho ama qoro.
Eye-hand coordination:	Wada shaqeynta isha iyo gacanta: Awoodda kartida ku wada shaqeynta isha iyo gacanta isaga oo qabanaya waxa uu arkayo gacanta iyo maskaxda ba ka qabanaya (sida isaga oo eegaya kombiyuutarka garaacayana makiinadda teebka, ama eegaya wax,

islamarkaana soo qaadaya).

Fine motor ability:	Kartida wanaagga wadashaqeynta muruqyada: Kartida ay xubnuhu wax ku wada qaban karaan, qalinka wax ku qori karaan, qaaddadana wax ku cuni karaan, iwm, (waa kartida isticmaalka muruqyada yar-yar ama aadka u dhuudhuuban).
Flat affect:	Dhooan: Muujiya dareen yar ama xaaasiyad.
Flexible, flexibility:	Dabacsan/Jalaqsan/Jalaqsanaanta: Kartida muruqyada si dabacsan loo isticmaalo.
Fluency:	Aftahan: aftahannimo ama luqada oo si wanaagsan loogu hadlo.
FM Unit:	Halbeeg raadiye: Halbeeg raadiye oo fasalka dhexdiisa wax lagu dhageysto si ardeyda ay uga caawiso maqalka baraha.
Foster parent:	Waalid barbaarshe uun ah: Waa waalid aqoonsi u heysta in uu barbaariyo carruurta ay waalikood hanan kari waayaan barbaarintooda.
Free appropriate public education (FAPE):	Waxbarshada lacag la'aanta ah ee dadweynaha: (WLD) Tibaaxdan waxaa leh xeerka federaaliga ah ee waxbarashada gaarka ah. Xeerka qaranka ee waxbarashada ayaa wuxuu dhigayaa in ilmo kastaa uu xaq u leeyahey in uu helo waxbarasho tayo leh oo lacag la'aan ah. xeerarka dawladda fadaraaliga ah ee waxbarashada gaarka ah ayaa waxay caddeynayaan in waxbarashada dadweynuhu ay lacag la'aan tahey ayna u haboontahey ilmo kasta. Tusaale ahaan magacan ooku caan baxey FAPE waxaa ay macanihiisu yahey in waxbarashdu ay lacag la'aan tahey kuna habboontahey.
Functional academic skills:	Rar shaxanka wada shaqeynta waxbarashada: Waxbarashada aasaasiga ah sida qoritaanka magaca, tusaalaha akhriska xuruufta, tirinta, ilaalinta ama raacidda shaciyada ama tilmaamaha fasalka.
Functional behavior assessment (FBA):	Qiimeynta dabeecadda aasaasiga ah: Marka uu ilmo leeyahey cillad dabeecadeed, dugsiyadu waxay ku sameeyaan qiimeyn falka ama ujeedada dabeecada ardeyga. maxey keentey dabeecadu? Muxu ardeygu sameeyey? Xirfada akhriska/ aasaasiga ah.
Functional reading skills:	Xirfado akhris oo shaqaynaya: Waa xirfadaha lagu barto wax akhrinta.

Gait:	Laclac: Waa sida uu qof u socdo ama uu u qaado tallaabada, tibaaxana waxaa lagu isticmaalaa marka qof qaba naafo sida uu u socdo ama uu talabada u qaado.
General Education:	Waxbarashada guud: Waa sida dugsiyada caadiga ah. Waa tibaax loo isticmalo
Goal:	Ujeedo/Madasha: Marka loo isticmaalo IEPs, madashu waxaa weeyaan oo loo qadan karaa waxaa macalimiintu iyo waalidku ay doonayaan in ardeygu ku barto sannadha gudahiisa.
Grade equivalent:	Udhigma heerka/heer-dhig: Waa dariiqo la isku barbardhigo layliga iyo heerka sannad dugsiyeedka. Tusaale ahaa hadii ardey fasalaka saddexaad ahi uu si fiican wax u akhriyi karo waxaa la odhan karaa hebba akhrikeedu waxaa uu u dhigmaa fasalka 8 aad.
Grasp:	Qabo/Qabasho: Waa sida uu qof faraha iyo suulka kor wax ugu qaadi karo ama uu wax ugu xajin karo gacanta.
Gross motor ability:	Awooda wada shaqeynta qofka murqahiisa: Awooda uu qofku ku fadhiisan karo, ku socon karo, ku ordi karo IWM. (kartida uu qofku ugu shaqeyn karo murqahiisa waaweyn).
Hand-eye coordination:	Wada socodka gacanta iyo isha: (ama wada socodka isha iyo gacanta). Kartida wax lagu eegi karo kadibna gacantu ay sameyso waxa indhaha iyo maskaxdu ay doonayaan in ay sameyso (sida eegitaanka kashaafada kombiyuutarka, kadibna ay makiinadda teebgareyso gacantu xuruufaha, eegitaanka iyo wax soo qaadista).
Handicap (noun), handicapping condition (noun), handicapped (adj):	Curyaan (magac), xaaladda naafada, curyaansan (magac kaabe): Waa karti la'aanta in uu qofku qabsado wax ama xirfadaha nolosha aadamiga looga baahan yahey caadi ahaan in uu qabsan karo.
Hard of hearing (HoH):	Dhago cuslaan: Waa hab kale oo lagu qeexi karo qof dhibaato ka heysato maqalka laakiin aan dhago la'ayn.
Hearing aid:	Maqal caawiye/maqal kaabe: Waa qalab kaalmeeya maqalka dhagaha.
Hearing domain:	Meesha maqalka: Kartida maqalka, waa takhasus ama waa tijaabada laxiriira meesha codka laga maqlikaro.
Hearing impaired (HI):	Maqal cilladeysan: Awood aan u laheyn maqalka codadka ama jabaqda caadiga ah.
Hearing officer:	Sarkaal Gar dhageyste ah: Gar dhageystuhu waxaa uu u egyahey garsooraha. Waxaa ay gudoomiyaan maareyna guurto jirin.

Hereditary:	Dhaxaltooyo: Dhibaato (mushkilad) caafimaad oo waalidku uu u gudbiyo carruurta ay dhalaan.
IDEA:	IDEA: "Individuals with Disabilities Education Act" waa magaca hadda loogu yeero sharciga Fadaraaliga ah ee ka doonaya in ay dugsiyadu siiyaan adeegga waxbarashada gaarka ah carruurta naafada ah.
Identification:	Caddeyn: Waxbarashada garka ah.
Imitative test:	Imtixaan ku dayasho: Waa imtixaan la doonaya in ay ardeydu ku daydaan waxa uu qofka imtixaanka qaadayaa sameynaayo (sida codadka oo la sameeyo ama saqashada, iwm).
Impairment (noun), impaired (adj):	Naafu (magac), naafeysan (tilmaan/sifo): Awood la'aan ama wax qabsasho la'aan wax caadi u ah nolasha.
Improve:	Hagaajin: In la hagaajiyo wax. Tusaale, "marka imtixaanka higgaaadda oo 20 erey ka kooban la siiyo, Daa'uud wuxuu kor u qaadaya inta jawaabood ee uu saxayo 12kii uu hore u saxey ila 18 ayuu gaarsiin.
Incidence:	Dhacdo: Magaca loola jeedo sida wax u dhaceen. Badanaa waxaa loo isticmaalaa waxyaabaha aadka u dhaca ama caadi ahaanba dhaca. Waxaa ay cagsi u tahey "dhacdooyinka yar-yar" (oo aan caadi ahaan dhicin).
Inclusion (noun), inclusive (adj):	Kudaris (magac) ku biiraya (tilmaan): Kudaris waxaa badi loola jeedaa nidaamka/fasalada ardeyga naafada leh ay wax la baranayaan ardeyda taamka ah ama dhan. Waxaa kale oo loo yaqaanna "kudarsi buuxa" waxaa loo isticmaalaa in lagu tilmaamo fasallada oggol ardeyga naafada leh.
Increase:	Kordhin: Samayn wax kororsan, ama ka roon intii hore. Tusaale, "markii la siiyay yeedhis ah 20 kalmadood, Daa'uud wuxuu ku kordhinayaa intuu saxay oo ahayd 12 ilaa 18 ayuu gaarsiin.
Independent education evaluation:	Qiimeynta madaxa banaan ee waxbarashada: Hadii ay waalidku aqbali waayaan qiimeynta uu dugsiyadu ameyey waxaa ay dalban karaan qofkale in oo aan dugsiyadu ka tirsaneyn in uu sameeyo qiimeynta. Maadaama qofkaasi ka madax banaan yahey dugsiyadu degmada waxaa loo yaqaanaa qiimeynta madaxa banaan ee waxbarashada.
Independent living skills:	Xirfad nololeed madax bannaan: Waxay dadku u baahan yihiin inay qabsadaan si ay kaligood u noolaadaan, sida soo adeegashada, karsashada cuntada, dhaqashada dharka iwm.

Individual Educational Plan (IEP):	Qorshaha waxbarasho ee shakhsiga ah: Qorshe qoraal ah oo caddeynaya halka ardeygu ku xooganyahey ama uu ku liito, dabadeedna waxaa lagu caddeynayaa waxa ay waalidka iyo macallimiintu ay rabaan in ilmuhu barto. Sharciga dawladda dhexe iyo kan gobalka ayaa sugaya in loo sameeyo ilmaha naafada ah.
IEP Manager:	Maamulaha QWS: Waa qofka ka tirsan shaqaalaha waxbarashada gaarka ah oo u xilsaaran QWS-ga ardeyga iyo la xiriirka qoyska.
Individual Family Service Plan (IFSP):	Qorshaha daryeelka qoys kasta si gooni ah (QDQQ): QDQQ-ku waxaa uu u egyahey QWS-ga waxaana iska leh carruurta ay da'doodu u dhaxeeyso dhalashadooda ilaa 3 sano jir. Daryeelka uu siiyo dugsiyu ka sakow, waxuu sharaxayaa daryeelka ay siin doonaan shaqaalaha xannaanada iyo caafimaadka iwm. Sidoo kale, daryeelka ay qoysku u baahanyihiin si ay carruurtooda u xanaaneeyaan. QDQQ-gu waa 1 sano.
Individual Interagency Intervention Plan ("Triple I P"):	Qorshaha ay dhawr hay'adood hal qof ku qiimeeyaan: (IIIP "Triple I P") waxaa uu la mid yahey IFSP laakiin waxaa loo isticmaalaa carruurta waaweyn. IIIP-ga waxaa ku jira adeegga uu dugsiyu bixiyo, iyo adeegyada bulshada ay bixiyaan hey'adaha caafimadku, iwm. Ulajeedada IIIP-gu waxay tahey in uu maareeyo adeegga kana caawiyo waalidiinta sidii ay u fahmi lahaayeen dhammaan wixii adeegyo ah ee ilmahoodu helayo. IIIP-gu waa mutadawaciiin, laakiin badanaa ardeyda naafada ahi waxay leeyihiin IEP (QWS) oo uga adeega dugsiyu, laakiin wax yar ayaa waxay leeyihiin IIIP si ay ugu maareeyaan adeegyada dugsiyada iyo kuwa hey'adaha kale.
Informed consent:	Wargalin oggolaansho: Waxa aad eegtaa "Ogolaanshaha". Marka waalidka laweydiisto in ay ka raaliyihiin in ilmahooda laga qaado imtixaan ama lagu meeleeyo waxbarashada gaarka ah, waa in ay fahmaan looguna sheego afkooda hooyo. Haddii uu qof saxeexo warqadda isaga ama iyada oon aan fahmin waxa ku qoran saxiixaasi mid jira ma aha.
Instruction:	Tilmaamo/Cashir/Dersi: Baarista macluumaad cusub ama xirfad cusub.
Instrument:	Qalabka: Eeg qalabka qiimeynta.
Integrated:	Isku dhaf/Isku dar: Waxaa uu tilmaayaa fasal ama arday.

Intellectual ability, cognitive ability, intelligence, intellectual capacity:	Awood garaad, awood fahmid: Badanaa waxay u taagantahey awoodda lagu fikiro, laguna xusuusto macluumaadka. Lagu xaliyo masalooyinka dahsoon.
Intelligence:	Garaad/caqli: Waa karti ama kasitaan uu qof leeyahay.
Interagency:	Wada shaqeynta hay'adaha: Waa weedh (erey) u taagan iskaashiga u dhaxeeya hay'adaha iyo caawinta qoyska ilmaha. Tusaale, qoyska leh ilmo yar oo naafo ah waxaa laga yaabaa in ay kaalmo uga baahdaan adeegga caafimaadka ee beesha (county), bukaan eegtada gaarka ah, shaqaalaha daryeelka bulshada iyo dugsiyada dadweynaha. Taas waxaa loo yaqaanaa "iskaashi u dhaxeeynta hay'adaha" ama "wada shaqeynta hay'adaha".
Interim setting, interim placement:	Kumeel gaar/kusii meeleyn/kumeeleyn aan joogto aheyn: Kumeeleynta si kumeel gaar ah waxaa loo isticmaalaa marka ardey hadda u soo guurey degmada si ku meel gaar ah dugsi loogu meeleeyo ama ardey dhibaato heysato kaas oo mustaqbalka u baahan in lagabadalo meeleytiisa/meeleyteeda.
Intermittent:	Aan joogto aheyn: Waxa marmar iyo dhifka ah. Waxaa lid u ah waxa joogtada ah.
Interpreter (noun), interpreter (verb), interpretation (adj):	Af celiye/turjumaan (magac) turjumaad (fal): Waxay u taagan tahey habka u dhaxeeya ee ay isku afgartan laba qof oo aan isku luqad ku hadlin. Waxay tani khuseysa luqadaha lagu hadlo (Isbaanishka, Ruushka, Moonga, iwm) ama luqada calaamadaha ee lagu afgarto dhagoolka.
Interpretation (of test results):	Turjumaadda (natiijada imtixaanka): Imtixaanada gaarka ah waxay turjumida macnaheedu tahey habka lagu eego natiijada imtixaanada oo dhan, kadibna go'aan laga gaaro waxa ka ifa ama kasoo baxa natiijada imtixaanada.
Intervention (noun), intervene (verb):	Kahor tag (magac), kahor tagga (ficil ama fal): Badanaa waxay ku saabsantahey shay ama wax la qabto ka hor inta aysan dhibaato dhicin si looga hortago dhibaataada foodda soo saaran ama laga yaabo inay dhacdo. Tusaale, Cali aad buu u murugoodey markii ay hooyadii dhimatey, markaa shaqaalihii dugsiyada waxay ka cabsadeen inuu isdilo. Markaasey Cali ku casuumeen inuu ku biiro koox ardey ah oo kala hadasha geerida iyo murugada.

Interview:	Xog warsi: Lasheekeysiga waalidka ama ilmaha si loo helo jawaabo ku saabsan su'aalo khaas ah.
Inventory:	Xog guurin: Nooc su'aalo ah, ama tix lagaga ururinayo wararka waalidka ama ardeyga. Tusaale, ardeydu inta badan waxay buuxiyaan liistooyinka ay ku urursan yihiin shaqooyinku si ay wax ugu tarto qorshaha mustaqbalka nooca shaqada ee ay rabaan oo ay xirfadeeda leeyihiin.
Itinerant:	Macallin wareega: Waa qof shaqaale ah oo dugsiyada ku wareega si uu ula shaqeeyo ardeyda halkii uu dugsi kaliya ama fasal kaliya joogi lahaa.
Job coach:	Tababare shaqo: Waa qofka caawiya dadka naafada sidii ay u shaqeyn lahaayeen. Tusaale, waxaa laga yaabaa in sharkadi ay shaqaaleyso dhawr qof oo naafo ah iyo tababare-shaqo. Tababaraha shaqadu waxaa uu barayaa shaqaalaha waxa ay qabanlaahaayeen, kadibna waxa uu fiirsadaa oo uu hubiyaa inay shaqadii si sax ah u qabanayaan.
Kinetic:	Dhaqdhaqaaqsan: Waxay ku saabsantahey dhaqdhaqaaqa xubnaha jirka.
Language delay:	Daahidda afka (luqada): Waa erayo lagu qeexo marka ay ilmaha yar afbarashadu ka daahdo ama aanu afka u baran sida caadi ahaan ilmuhu afka u bartaan.
Language disorder:	Cillad Luqada ku saabsan: Waa koox cillado ah oo qofka kaga dhaca luqada ama hadalka. Taas oo sababeysa in qofka ay dhibaato ka haleesho in uu fikraddiisa luqadda ku sharaxo. Waxaa laga yaabaa in ay qofka dhibaato ka heysato xagga erayada waaweyn ama isku xirka weedha si uu u sameeyo jumlad.
Language proficiency:	Si fiican u aqoonta afka (luqada): Waa awoodda ku hadalka iyo fahamka luqada.
Language sample:	Tusmo luqadeed: Tusaale ku saabsan sida uu ardeygu u hadlo, iyadoo inta badan cajalad la adeegsanayo. Waxaa laga yaabaa in turjume laga codsado inuu uruuriyo uguna badelo tusmo luqadeed la mid ah luqada uu ardeygu ku hadlo ama afkiisa hooyo.
Lead teacher:	Bare (macallin) horwade ah: Baraha ugu weyn ee barnaamijka naafada ama dugsiyada. Tusaale, waxaa laga yaabaa in dugsi uu heysto 5 SLD ama 1 hogaamiye bare SLD. Hogaamiyaha baruhu waxaa uu caawiyaa barayaasha kale wuxuuna qabtaa oo kale maamulka qaar ka mid ah.

Learning disability:	Karti la'aan (fahmo darro): Karti la'aan barasho.
Lip read:	Bishimo/faruuryo/dibno akhris: Awoodda qofka dhagoolka ah ayey ka mid tahey in uu akhriyi karo ama ka garan karo eegitaanka dhaqdhaqaaqa bishimaha qofka hadalkiisa waxa uu leeyahey.
Long term memory:	Xusuus dheer: Waa awoodda qofku u leeyahey inuu xusuusto wax mar hore dhacay.
Laws:	Sharci: Sharciyada waxa sameeya xubno ka mid ah dad la soo doortey kuwaas oo go'aamiya waxa ay dadku sameynkaraan iyo waxa aaney sameynkarin si ay u helaan mujtamac ama bulsho fiican. Sharciyadu waxaa ay bixiyaan qaanuunka guud.
Learning style:	Sida qofku wax ku barto: Sida uu qofku ku muujinkaro inuu wax cusub bartey. Tusaale, dadka qaarkood waxay wax ku bartaan fiirsashada ama akhriska macluumaadka. Dad kalena waxay u xusuusankaraan waxa ay maqleen si ka wanaagsan waxa ay arkeen.
Least restrictive environment (LRE):	Meesha/deegaanka ugu yar ee lagugu xadidi karo: Weedhan waxaa loo isticmaalaa dawladda Fadaraaliga ah. Qaanuunka hoos ka xariiqani waxaa uu yahey in ardeyga naafada ahi uu aadi kari dugsi ay walaalihii aadaan ama ka dariskiisu aado ama ka caadiga ah. Ardey kasta, kooxda ayaa ka go'aan qaadaneysa meesha ku habboon ee haqabtireysa baahidiisa ama laga yaabo in uu yahey caadi. Tan ayaa ah "LRE" ee ardeyga. Kooxdu waa inay ku meeleeayaan ardeyga meesha ama be'ada ugu yaraan ugu haboon sida (waxbarashada gaarka ah) haddii aysan jirin siyaabo kale oo ardeyga loo caawin karo.
Limited (adj), limitation (noun):	Xadidan (sifo), xadid (magac): Ka khibrad yar ama ka awood yar inta qofka caadiga ahi qaban karo. Tusaale, "Faisal awooddiisa akhris iyo fahmidi wey ka xadidatahey buugaagta fasalka."
Limited English Proficiency (LEP):	Aqoonta ingriisiga ay xadidan (LEP): Waa erey bixin uu gobolku u isticmaalo in loogu yeero ardeyda luqadooda hooyo aaney aheyn ingriisiga, kuwaas oo u baahan in ingiisiga loogu sharaxo luqad labaad.
Listening comprehension:	Dhageysi la kaso (fahmo): Awoodda fahamka waxa qofka dhagahiisu maqlayaan.
Low vision:	Arag yari/hinbidhiisi: Waa qof aan aad waxa u arkeyn laakiin aan indhoole buuxa aheyn.
Mainstream (noun):	Caadi ahaan (magac): Waa eray bixinta dugsiyada caadiga ah, iyo fasallada caadiga ah. Tusaale, "Kifaax waxa ay aaddaa fasalka akhrinnta gaarka ah, xisaabtase waxay ka qaadataa fasallada caadiga ah."

" Nadia maalinta inteeda badan waxay gashaa fasallada caadiga ah."

Mainstream (verb):	Caadiyeyn (ficial), u tahey caadiga: Kadhigid sida caadiga ah. Waana isku macno laakiin waxa kaliya oo loo isticmaaley fal-ahaan. Tusaale, "waxa ay kooxd u isku raacdey in Kifaax fasalka xisaabta ah la geliyo." " Kifaax fasalka xisaabta caadiga baa lagu qorey."
Maintain:	Sugitaan-heer: Kuheynta wax heerka uu joogo, si aanu uga sii xumaan. Tusaale, haddii ardey dhaqdhaqaaqa xubnaha jirkiisu uu xadeysanyahey, himilada baansinta ama xanaaneynta jirkiisu waa in ay ku koobantahey sugnanta heerka uu joogo dhaqdhaqaaqiisu.
Management aid:	Kaaliyaha maareynta: Waxay ardeyda ka caawiyaan fasalka dhexdiisa, kaas oo ka caawiya ardeyda sidii ay dhaqdhaqaaq ugu sameyn lahaayeen agagaarka dhismaha, waxaa kaloo ay ka caawiyaan aadaba ardeyda.
Manifestation determination:	Xaqiijin go'an qaadasho: Waa tibaax loo isticmaalo in loogu yeero habka go'aanka looga gaarayo ilmaha IEP-giisa ama habka qiimeynta naafada ilmuhu qabo. Waxaa la hubin in naafada uu qabo awgeed uu u sameynaayo dabeecadaha qaarkood. Nidaamkan waxaa looga baahayahey in lagu dhaqmo marka uu ardey naafo ahi uu jabiyo xeerka ka soo hor jeeda ku dagaallanka dugsiga, aflagaadada, iyo wixii kale ee soo raaca. Inta aan ardeyga la ciqaabin ama aan la eryin ayaa waxaa ka tashanaya gudiga habka qiimeynta naafada kana gaadhaya go'aan bal in ay naafadu keentey dhibaataada iyo bal hadii uu ardeygu garanyo in ay khalad tahey iyo in uu awood u lahaa inuu dabeecad xumadiisa iscelinkaro/iscelinkarto iyo inkale.
Manipulatives:	Gacan ku-heydsiyo: Waa waxyaabo yar-yar oo ardeyga loo dhiibo si uu wax ugu sameeyo. Tusale, imtixaanada qaarkood waxaa ka mid ah in ardeyga loo dhiibo alaab midabyo kala duwan leh oo laga doonayo in uu qaar ka mid ah israaciyo sida ay isku leeyihiin ama ay iskugu xig-xigaan. Ardeyda qaarkood ayaa waxa ay wax ku sameyn karaan gacan-ku- heysiyada laakiin aan ku sameyn karin waraaqaha (tusaale, waxa ay xisaabta ku sameyn karaan baloogyada laakiin kuma sameyn karaan waraaqadaha).

Manual restraint:	Gacmo ku xajin: Xajinta iyada oo la isticmaalayo gacmaha iyo cududa si loo xajiyo ardeyga jirkiisa. Waxaana loo xajinayaa si loo badbaadiyo iyaga ama aanu wax yeelin dadka kale.
Math facts:	Xaqiiqda xisaabta: Garashada sameynta xisaabta aasaasiga ah. Sida isku-dhufashada ama isku-darka halka god ee lanbarad ($1+1=2$, $1+2=3$, $1+3=4$, iwm).
Math operation:	Kashaqeynta xisaabta: Isku-darka, kala-jarka, isku-dhufashada, isu-qeybinta.
Mean:	Tiro siin: Xisaab ahaan waa soo saarka celceliska.
Mean length on utterance (MLU):	Dhameystirka hadalka ujeedadiisa (MLU): Waa sida uu ardeygu hadalkiisu jumlad ahaan u dhameystiran yahey. Tusaale, marka uu ardey u baahayahey cabitaan, ama casiir mawaxa uu dhagaa "Aniga cabitaan", mise waxa uu yidhaahadaa " Wax aan cabbo ma heli karaa? MLU waxa loo isticmaalaa qiimeynta ardeyga hadaaqiisa iyo luqadiisa.
Mechanical restraint:	Xayireyaal qalab: (sida dhex-xirka) ama meel (sida qol laguxereeyo marka wax uu sameeyo) taas oo loo isticmaalo marka la doonayo in ardeyga la ilaaliyo. Xayireyaashu waxa ay ardeyga naftiisa ama dadka kale ka ilaalinayaan in uu wax yeeleeyo.
Mediation:	Dhexdhexaadin: dhexdhexaadin labo kooxood iyo wixii la mid ah.
Medically fragile:	Caafimaad xumo/caafimaad ahaan jilicsan: Waa eray loo isticmaalo qofkii caafimaad ahaan liita oo u baahan xannaano farabadan.
Memory:	Xusuus: Waa awoodda ku heynta maskaxda macluumaad iyo isticmaalka marka loo baahdo.
Mental health:	Caafimaad maskaxeed: Waa eray lagu tilmaamo sida ay dadku wax u dareemaan ama ay u muujiyaan dareenkooda
Mental impairment, mentally impaired (MI):	Maskaxda naafo ka ah/naafo maskaxeed: Waa naafada ku sifeysan garaadka iyo maangaabnimada ku sifeysan deebacadaha oo keena xirfad la'aan.
Mentally retarded:	Dib u dhac maskaxeed: Arag maskaxda xaniban.
Mild:	Fudud/sahlan/khafiif ah: Waa eray loo isticmaalo ardeyda qabta naafada fudud. Dugsiga waxa ay uga baahayihiin caawimaad gaar ah, laakiinse si madaxbanaani ah ayey u noolaan karaan una sheekeysan karaan marka ay dhameeyaan waxbarashadooda.

Moderate:	Meel dhaexaad: Waa erey loo isticmaalo in loogu yeero ardeyda qabta naafada dhexdhexaadaka ee caam ahaan hooseysa. Ardeydaydaas waxaa laga yaabaa in ay si gooni ah u noolaan karaan marka ay helaan kaalmo yar.
Modification:	Hab doorin: Kusameyn badal laxaad leh maadada wixii looga baahnaa ama imtixaan si loo fududeeyo sida badan waxa muujiya qorshaha waxbarashada ee loo yaqaan IEP. Tusaale, aynu dhahno ardeydu waxa ay 50 su'aalood oo xisaab ah ku sameyn karaan 10 daqiiqadood si ay ugu gudbaan. Waxaa laga yaabaa IEP-ga ardeyga naafada ahi in uu dhaho "Axmed waxaa uu 20 su'aalood oo xisaab ah ku dhameyn karaan 10 daqiiqadood." Tani waa habdoorin ama hawlfududeyn. Fiiiri hawlfududeynta.
Nationally normed:	Qaran ahaan laga filayo/qaran ahaan dhaqan u ah: Waa imtixaan laga filayo ama laga rabo dhammaan ardeyda Mareykanka ah.
Noncompliant behavior:	Dabeecad aan waafaqsaneyn: Dabeecad aan raacsaneyn sharciga iyo tilmaamaha fasalka.
Nondiscrimination (noun), nondiscriminatory (adj):	Aan lakala soocin (magac), Aan kala soocnayn (tilmaan): Dugsiyada, waxaa tibaaxdan loogu isticmaalaa iyada oo loo tixraacayo qalabka fasalada iyo imtixaanada in aan lagu kala soocin ardeyda ama aan loo kala eexan iyada oo loo eegayo kala duwanaashaha ardeyda jinsiyadooda ama dhaqankoodaba. Shaqaalaha waxbarashada gaarka ah waxaa sharci ahaan ay ku khasbanyihiin inay raacaan qaanuunka eexasho la'aanta ee ogolaanaya in dhammaan ardeyda loogu shaqeeyo si cadaalad ah.
Nonverbal ability:	Kartida aan hadalka aheyn: Kumuuujinta caqliga siyaabo kale oo aan hadalka aheyn, sida sawirka, garashada sawirada, doorashada muuqaalka jawaabaha saxda ah. Ardeydu waxay jawaabta ku bixiyaan iyaga oo wax sameynaya, tilmaamaya, iwm.
Nonverbal test/nonverbal scale:	Imtixaanka aan afka aheyn/imtixaanka hadalka laheyn: Waa imtixaanka aan ardeygu isticmaaleyn hadalka ama qoraalka luqada marka uu jawaabta bixinayo, ardeydu waxa ay kaga jawaabaan su'aalaha qaarkood iyaga oo sameynaya waxyaabo, ama wax tilmaamaya, iwm.

Norm (noun), to norm (verb), norming (noun):	Lacaadeeyay/ladhaqameeyay/isku-celceliska (magac), isku-celcelis ahaan (ficil), sameynta isku-celceliska: Marka magac ahaan loo isticmaalayo waa isku-celceliska, marka ficil ahaan loo isticmaalayana waa qeyb kamid ah habka sameynta imtixaanka qiyaasan. Barayaashu waxay imtixaan ka qaadaan dhammaan ardeyda o dhan da'kasta iyo dhamaan qeybkasta oo waddanka ka mid ah, si ay u ogaadaan isku-celceliska oo ah marka la isku celceliyo guud ahaan dadka oo dhan. Habkan ayaa loo yaqaannaa "isku-celceliska".
Norming sample:	Tusaalaha/tusmada isku-celceliska: Waa koox ardey ah oo laga soo qaadey dad kala duwan oo tiro isle'eg laga soo qaadey jinsiyad kasta si loo ogaado waxa uu isku-celceliska ardeydu noqonkaro taas oo qiyaas ahaan loo qaadan doono mustaqbalka si looga dhigto bar tilmaameed.
Norm-referenced test:	Imtixaanka loo qaadanayo isku-celceliska: Waa imtixaan lagu barbardhigayo ilmo, ilmo kale oo da'diisa ah (lagana dhiganayo heer beeg celcelis); darajooyinka uu helaa waxay tusayaan hadii ilmo uu ka fiican yahey kuwa da'diisa ah iyo in uu ka liito. Badanaa imtixaanada waxbarashada gaarka ahi waa kuwa celcelika qiyaasan ama cayiman oo la tixraaco.
Note-taker:	Cashir qore/nuxur qore: Waa qofka dhageysta sharraxa fasalka u qorana nuxurkeeda qof aan wax qorankarin laakiin wax akhriyi kara.
Notetaking:	Qaadashada nuxurka: Dhageystaha sharraxaada barahu uu aad ugu dhawaaqayo iyo qoritaanka waxyaabaha muhiimka ah.
Notice, written notice, prior written notice:	Ogeysiin, ogeysiin qoraal ah, ogeysiintii hore ee qoraalka aheyd: Tallaabada ugu horeysa e habka warbixintu waa ogeysiinta waalidiinta waxa uu dugsigu damacsanyahey in uu sameeyo. Tani waxaa loo yaqaannaa " ogeysiin". Ogeysiintu waa in ay noqotaa qoraal. Waxbarashada gaarka ah, qaanuunka iyo sharciga ayaa waxay khasbayaan dugsigu inuu siiyo ogeysiin ka hor inta aaney sameyn wax (ogeysiin qoraal ah horta). Sidoo kalena waxuu sharciga gobolku dhigayaa in la ogeysiyo walidiinta ardeyga kadib marka lagu qoro ama lagu meeleeyo barnaamijka barashada Ingriisiga.
Number concepts (numeric concepts):	Aqoonta u jeedada lambarrada: Waa aqoon u lahaanshaha lambarrada macnahooda ama awoodda aqoonta 5 tufaax iyo 5 dhaqax.

Number recognition:	Garashada lambarrada: Awoodda garashada lambarrada laqorey iyo akhriskooda.
Objective:	Ujeedo/himilo: Qaadista tallaabooyin dhawr ah si loo gaadho himilada u jeedada LEP-ga.
Observation (noun), observe (v):	U fiirsasho/dhugasho: Ilaalinta ardey jooga fasalka ama garoonka ciyaaraha, iwm. Fiirinta sida ardeygu u sameynayo waxyaabo. Tusaale, haddii ardey ay dhibaato ka heysato akhriska, waxaa loogu yeedhayaa baraha waxbarashada gaarka ah si uu u fiiriyo sida uu wax u akhrinayo iyo dhibaataada ardeyga/ardayadda ka heysata fasalka akhriska, iyo in la fiiriyo bal haddii uu ardeygu/ardayaddu u fiirsanayo/fiirsaneyso waxa uu akhriyayo/akhriyeyso.
Obsessive/compulsive disorder:	Walwal/ walwal iyo cabsi joogto ah: Waa walwal iyo cabsi joogto ah oo qofka maskaxda ka heysata oo marwalba qofku ka fikirayo si joogto ah.
Occupational therapist:	Jimicsi yaqaanka: Waa qof khibrad u leh sidii ay dadku u isticmaali lahaayeen muruqahooda si ay u qabtaan shaqooyinka qaar ka mid ah. Jimicsi yaqaanka ku takhasusey sidi ay murquhu u dhaqdhaqaaqi lahaayeen sida uu qofku qalin ugu qaban lahaa qaaddo korkeeda, qoraalka, cunitaanka, cadeysashada, iwm.
Off-task:	Shaqada ka baxsan: Aan macallinka tixgalin siin marka wax la sharxayo ama aan si fiican ugu fiirsan, aan sameyneyn waxa loogu tala galey in ay sameeyso/uu-sameeyo.
Omission:	Kareebid: In wax laga reebo, aan ka jawaabeyn su'aasha imtixaanka.
One-on-one:	Kali-kali/qof-qof: Waa kaaliyaha baraha ee ardaygiiba keli ahaan ula shaqeeya.
On-task behavior:	Dhug-uleh: Aad ugu fiirsada sharraxa fasalka ama tixgaliya oo sameeya shaqada loogu tala galey in uu-sameeyo/ay-sameeyso.
Open-ended task:	Waa shaqo aan dhameystir laheyn: Waa shaqo dugsi ama waxqabasho aan dhameystir laheyn ama jawaabla'aan ah. Tusaale, qoritaanka curisku waa su'aal furan. Waxa cagsi u ah shaqo xiran ama shaqo dhameystir leh.
Oral comprehension:	Kasitaan hadal laxiriira: Awoodda garashada qof kale luqadiisa ama hadalkiisa.
Oral expression:	Hadal: Awoodda qofku ku gudbin karo waxa uu rabo isaga oo isticmaalaya kalmado.

Orientation and mobility (O and M):	Jiheynta iyo dhaqdhaqaaqa (O and M): Waa jiheynta ama tababbar siinta dadka indhoolayaasha ah sidii ay u baran lahaayeen inay usha ku socdaan ama eygu uu hoggaamiyo, sidii ay u heli lahaayeen meelaha dugsiga ama guriga dhexdiisaba.
Other health impaired:	Dhibaatooyin caafimaad oo kale: Waa tibaax loo isticmaalo in loogu yeero ardeyda kale ee qabta dhibaatooyin caafimaad kuwaas oo ku adkeynaya inay wax bartaan.
Otitis media:	Dhago xanuun: Waa eray caafimaadka oo loo isticmaalo dhago xanuunka kaas oo caadi u ah carruurta. Dhago xanuunka faraha badani waxaa uu sababaa dhago la'aan.
Paragraph:	Qoraal dhawr oraahood ka kooban/jumlad/duluc: Waa qoraal gaaban oo ka kooban weedho la xiriira hal fikrad ama mowduuc.
Paragraph production:	Soosaaridda/curinta oraahda: Kartida qorista oraah dhan oo hal fikrad ku saabsan.
Paraprofessional, para:	Gacanyare xirfadle ah: Waa qofka ku caawiya carruurta dugsiga isaga uu kor ka ilaalinayo bare oggolaansho (liisan) leh. Gacanyare-xirfadleyaashu ma ay heystaan liisanka wax barista.
Parent:	Waalid: Waxaa xagga sharciga ah ay ilmaha hooyadiis iyo aabihiis u leeyihiin. Waalidka sharciga ahi waa in uu oggolaadaa, saxiixaana in ilmahoodu qaato ama galo waxbarashada gaarka ah.
Percentile:	Boqol tobneyn/boqol-tobnaad: Waa waddo kale oo la iskugu barbar dhigi karo ardeyda. Boqoltobneyntu sida badan waxaaa lagu tilmaamaa tobanno – sida boqoltobneynta 1-aad, boqoltobneynta 2-aad, boqoltobneynta 3-aad, iwm. Ardeyga ku jira boqoltobneynta 80- adad waxaa uu ka sareeyaa ardeyga ku jira boqoltobneynta 70-aad, waxaana uu ka hooseeyaa ardeyga ku jira boqoltobneynta 90-aad.
Performance ability:	Kartida wax qabadka: Waa siyaabo kale oo lagu muujiyo garaadka, sida sawir gacmeedka, ka jawaabidda waxa sawiran, doorashada ku jawaabidda muuqaalka, sameynta waxyaabo, iwm. Waxay la micno tahay <u>nonverbal ability</u>
Perinatal (adj):	Xanuun/cudur/cillad ku dhacday ilmaha: Waxaa loo isticmaalaa in lagu sharraxo wax ku dhaca ilmaha markay hooyadu foolaneyso ama marka ay dhasho wax yar ka dib.

Perseverate (verb):	Ku celcelinta hadalka: Waa sii wadista ku celcelinta hadalka, waana fal ama dhaqan aan wax micno ah laheyn. Tusaale, haddii macallinku uu ardey weydiiyo, maanta waa maalintee? Ama maanta waa ayaanma? Haddii ardeygu ku jawaabo "Talaado", oo uu siiwado dhihidda "Talaado, Talaado, Talaado," oo uu kucelceliyo isaga oo aan joojineyn, waxa uu sameynayaa ku celcelin hadal qura.
Personal care attendant (PCA):	Xannaaneeyaha dadka daryeelka u baahan: Tibaaxdan looma isticmaalo dugsiyada. Marka qofku uu aad u curyaansayahey ama naafeysanyahey ama dhibaato caafimaad heysato waxaa la siiyaa (PCA) kaas oo ku caawiya qofka guriga iyo bulshada dhexdeeda. PCA mushaharkiisa waxa bixiya adeegyada bulshada ama adeegyada caafimaadka.
Phoneme:	Dhawaaq: Waa cod ama dhawaaq keligii ah. Tusaale, "P" waa hal cod. "PI" waa laba cod. Kalmadda ciyar (play) waxay ka koobantahey 3 cod P+l+a (y- wey aamusantahey).
Phonics (noun), phonetic (adjective):	Cilmiga dhawaaqa xarfaha (magac), higgadinta (tilmaan): Xiriirka codka iyo xarfka si loo furfuro ereyada, ardeydu waxay u baahantahay inay yaqaannaan cilmiga dhawaaqa xarfaha.
Physical impairment (noun), physically impaired (adj):	Naafada laxaadka (magac), Naafe laxaad (sifo): qayb ay ka mid tahey dhaawac saameeya jirka oo aan wax u dhimin maskaxda. Tusaale, haddii qofka uu dhinacu qallalo laakiin uu soconkaro qofkaasi waa naafo. Carruurta leh naafo laxaad way dhici carta inay u weheliso ama ayna u wehelinin naafo garasho.
Physical therapist:	Daaweeyaha Jirka/daaweeyaha laxaadka: Waa dhakhtar u khaas ah muruqyada jirka iyo nuuxnuuxsigooda, ama dhaawac muruqyada ka soo gaadho. Daaweeye laxaadku waxay aalaaba xoogga saaraan xirfadaha lagu dhaqdhaqaaqi karo, laisku taagi karo, lagu socon karo, iwm. Dhakhtaradaasi waxay ka shaqeeyaan bukaan eegtooyinka, cusbitaallada iyo dugsiyadaba.
Placement:	Diiwaangelin/kuqorid/meeleyn: Go'aan (qaraar) wada jir ahaan lagu gaaro ilmaha dugsiya la geyn lahaa. Tusaale, go'aanka meeleynta waxaa loola jeedaa ka uu ka soo baxo shir loo dhan yahey oo ilmahana dhigaya heerkiisa.
Positioning:	Habka meel dhigga qofka: Qofka jirkiisa ayaa loo dhigi hab uu u nasto, una arko, iwm, iyo inuu gaaro qalabka. Habka meel-dhigga waxaa badanaa loo sameeyaa ardeyda naafada ah een iskood u

dhaqdhaqaaqi karin.

Post-traumatic stress disorder (PTSD):	Xanuun ka dhasha dhibaato xun kadib: Waa nooc cillado dhimirka ah oo ay keento dhibaato culus oo qofka ku dhacday.
Pre-employment skills:	Xirfadaha shaqo galista kahor: Xirfadaha shaqo galista kahor ee loo baahanyahey in ardeygu leeyahey in ta aanu bilaabin dugsiga xirfadlayaasha ama shaqada. Tusaale, aqoonta sida arjiga shaqada loo buuxiyo, aqoonta sida loo tago meel iyo inta waqti ay qaadato, aqoonta sida loo raaco basaska iyo meelaha uu tago.
Preferential seating:	Fariisin meel ku habboon: Meelo gaar ah oo la iskula fariisinayo ardeyga laxaadka la'. Tusaale, ardyga indhaha aan aad wax uga arag wuxuu u baahanyahey in la fadhiisiyo xagga hore si uu u arko waxa sabuuradda ku qoran.
Premature:	Dhacis: Dhalashada inta aan sagaalka bilood la gaarin, ilmo dhashey intuuna dhammeys tir gaadhin.
Prenatal:	Uur kujir: Dhalashada ka hor.
Prereferral intervention:	Guda galka gudbinta horteed: Ka hor tagga la qaado intaan ardeyga loo gudbin barnaamij waxbarasho khaas ah si loo qiimeeyo. Tusaale, gobolka Minnesota sharicigiisa dugsiyada ayaa waxaa uu dhigayaa in ardeygu uu soo maro labo ka hortag intaan la gudbinin marka laga reebo xaaladaha degdegga ah.
Present level of functioning:	Heerka waxaqabadka xilliga la joogo: Waxa ay la mid tahey <u>present level of performance</u>
Present level of performance:	Heerka wax qabadka xiliga la joogo: Waa weedh loo isticmaalo ardeyga ingriisigiisu yaryahey si loo falanqeeyo xirfadaha gaarka ah ee ay leeyihin xiliga taagan.
Principal:	Maamule: Isku duwaha dugsiga.
Procedural safeguards:	Hab raaca badbaadada: Badbaadadu waa waxyaalo ilaaliya nabad gelyada ee kaa dhawra dhibaata. Badbaadadadu waxay kaa ilaalisaa in jirkaaga ama hantidaada wax soo gaaraan. Habraaca badbaadadu waa talaabooyin ama qaanuun, kaas oo u shaqeeya sidii ay badbaadadu u ilaalin laheyd xuquuqda sharciga ah ee dadku ay leeyihiin.

Program:	Barnaamij: Waa eray loo isticmaalo si loo tilmaamo waxyaalaha dugsi meel gaar ah ku yaal uu qabto. Barnaamijku wuxuu noqon karaa mid si wada jir ah loo qabto ama wax si gaar ah loo qabto. Tusaale, " dadku waxay yiraahdaan waxaan heysannaa barnaamij waxbarasho gaar ah oo aad u fiican", "barnaamij dugsiyo farshaxan oo aad u fiican", "barnaamijka dugsiyada aagnaanta ah oo fiican", iwm.
Program aid:	Barnaamij kaaliye: Waa xirfadle-kaaliye loogu tala galey inuu caawiyo ardeyda fasallada waxbarashada gaarka ah.
Prompt:	U billaabid/dhakhsii/cinwaan: Dhiirin-tusmeyn nooc waxbarashada loo adeegto; Tusaale, haddii bare uu doonayo in ardey uu qoro curis, wuxuu sabuuradda ku qoraa jumlad ama duluc, taas oo ah billowga sheekada. Dulucdan ayaa waxaa la yiraahdaa dhakhsii/cinwaan.
Protocol:	Hab maamus/ Hab raac: Waa foomka jawaabta imtixaanka qiyaaseysan. Inta badan waxbarashada gaarka ah imtixaankooda qiyaaseysani, khabiirka cilmi-nafsiga, bare ama hadaaq-yaqaan ayaa tusa waxyaalaha imtixaanka ku jira ama su'aalaha, kadibna ku qora jawaabta hab-raaca ama hab-maamuuska.
Psychological report (psych report): Psychologist, School psychologist:	Warbixinta cilmi-nafsiga: Warbixin uu qof yaqaan cilmi-nafsiga diyaariyey. Cilmi-nafsi yaqaanka dugsiya: Waa qof ku xeeldheer aqoonta waxa ilmuhu ku fikirayaan, ay dareemaan ama ay bartaan; kaas oo loo tababarey sidii uu u tijaabin lahaa garaadka dhinacyada bulshada/caadifada sida ay u shaqeeyaan. Dhimiryaaqaanku ama cilmi-nafsi yaqaanku wuxuu leeyahey darajada mastarka ama Ph.D. Ma aha dhakhtarka daawada mana qori karaan daawo. Dhimiryaaqaanada/Cilmi-nafsi yaqaanada dugsiyadu waxay leeyihiin liisan ka duwan ka dhimiryaaqaanka bukaaneegtada (<u>clinical psychologists</u>) kaas oo ka shaqeeya meelaha loogu tala galey daaweynta.
Range of motion:	Xadka dhaqdhaqaaqa: Eray loo isticmaalo daaweynta laxaadka si loo tilmaamo baaxada dhaqdhaqaaqa ee ay xubini sameyn karto. Tusaale, xadka dhaqdhaqaaqa qacanta iyo garabku waa goob (wareeg) baaxadeedu tahay 360 darajo.
Rate:	Tiro labarbar dhigo tiro kale/cabir waqtiile: Inta ay qabashada wax qaadan karto. Tusaale, cali wuxuu akhriyi karaa 40 erey daqiiqaddiiba.

Rating scale:	Cabir xawli/ cabir waqti: Tirooyinka koox ah sida: dhinaca hoose 1 2 3 4 5 dhinaca sare. Barayaasha iyo waalidkuba waxay goobaabi doonaan habka uu ilmuhu wax u sameynkaro. Tusaale, 1 haddii wax tirinta ilmahoodu ayna fiicneyn, 5 haddii wax tirinta ilmahoodu ay aad u fiicantahey.
Raw score:	Dhibco sidoodii ah: Ardeygu dhibcaha uu asal ahaan keeno markii la fiiriyo jawaabaha uu saxay. Kadib wuxuu imtixaan qaaduhu sameeyaa xisaabtan si uu u helo dhibcaha isku celceliskooda.
Reading comprehension:	Fahmida akhriska: Kartida fahamka waxa la akhrinayo.
Reading rate:	Xawliga akhriska: Degdegga uu ardeygu ku akhriyo ama inta eray ee uu ardeygu akhrin karo daqiiqaddiiba.
Reasoning:	Aragtiyayn/sababeyn: Kartida fikrada si loo furfuro mala awaal.
Receptive Language:	Afka (luqada) ku duxa: Fahmka luqada la maqlo.
Receptive vocabulary:	Ereyada ku duxa: Erayada ardeygu fahmi karo.
Reduce:	Yar/la yareeyay: Inaad sameyso intii hore kayar. Tusaale, haddii leyli higgadeed oo 20 su'aalood ka kooban, Cali 2 ayuu qalday halka uu markii hore 8 qalday.
Re-evaluation:	Dib u qiimeyn: Ardeydu waa inay galaan dib u qiimeyn saddexdii biloodba ma
Regular education:	Waxbarasho caadi ah: Eray loo isicmaalo fasalada iyo dugsiyada ardeyda caadiga ah ee aan wax cilla ah qabin.
Reinforcement:	Dhiirrigelin: Waxyaalaha ardeyga dhiirrigeliya si markale anshax fiican loogu arko. Tusaale, ardeygo abaal marin lagu siiyo wanaag uu sameeyey awgeed. Waxa lid u ah Ciqaab
Related services:	Adeegyo la xirira: Eray loo isticmaalo in lagu tilmaamo ardey naafo ahi baahida saa'idka ah ee uu u qabo in laga caawiyo sharraxaadda cashirka iyo daaweynta laxaad li'idiisa.
Reliable (adj), reliability (noun):	Lagu tiirsanaan karo/sugan (tilmaan), sugnaan (magac): Kani waa weedh sharaxaysa layli inuu bixinayo natiijooyin isku si ah mar kasta. Tusaale, haddii dad kala duwan isku arday ka qaadaan imtixaan, waxa ka soo baxaa waa isku mid, haddii ardey kala wuwan laga qaado imtixaan waqti kala duwan, natiijadu wey xiddidantahey. Imtixaanada dhexe waa in ay xiddidnaadaan.

Residential treatment:	Guri wax ku daawayn: Waa xannaaneynta guriga lagu qabanayo ama lagu daaweynayo.
Resource room:	Qolka laga helo wixii loo Baahyahey: Qolaka khayraadka ama tabta wax loo sameeyo.
Resource teacher:	Bare caawiya macallimiinta kale: Baraha haya warar dheeraad ah oo la xiriira meelo badan oo kala duwan ama baraha tabaha yaqaan.
Respite care:	Daryeel nasasho: Kalmada macnaheedu halkan waxay lamid tahey nasasho, raaxeysi. Waalidiinta ilmaha naafada jirka ee aadka u daran qaba waxaa laga yaabaa ineyna ilmahooda waligood kali ka dhigin ama ka tagin. Taas macnaheedu waxay tahey ineyna waalidiintanu heli karin waqti ay cunto ku soo iibsadaan, ay qaraabo ku soo booqdaan, ama ay ilmahooda kale dugsigooda aadaan. Xaafadda shaqaalaheeda bulshadu ayaa waxaa uu u soo dirayaa qof ka nasiya hawsha, kaas oo ay kaga tagi karaan ilmahooda naafada ah si ay wax u soo qabsadaan.
Response:	Jawaab celin: Jawaab su'aaleed waxaa kale ooy tahey falgalka duleed ee jirkaagu sameeyo marka wax xadanteeyaan ama taabtaan – fiiri ereyga <u>stimulus</u>
Retain (verb), retention (noun):	Hayn (fal), haysasho (magic): Halkan macnaheedu waxaa weeyaan marka aad xusuusato macluumaad ama waayo aragnimo ku soo martay.
Retain (verb), retention (noun):	Hayn ama xaji (fal), xajin, ama haysasho (magac): Waa marka ardey dib loo celiyo ama la hayo sannad kale
Reward:	Abaal marin: Waa waxa loo garto ardey gaara ama muujiya anshax fiican. Waxay noqon kartaa nacnac, qalimo iyo buugaag, ama ciyaar ama howl uu jeclaa oo loo oggolaado inuu ka qeyb galo.
Rights:	Xuquuq: Waa sharciga iyo qaanuunku waxa uu qofkaas u ogolyahey oon laga qaadi karin.
Rules:	Xeer: Xeerarku waa habab cayiman oo ah sidii sharciga loo fulinayay. Xeerka waxaa soo dajinaya shaqaale ka tirsan heya'daha dawladda. Dadweynuhuna waxay fursad u leeyihiin inay wax ka yiraahdaan xeerka la dajiyey. Kaddib ayaa waxaa go'aan ka gaaraya haddii ay xeerka dani ugu jirto dadweynaha iyo haddii kale xaakin. Marka la ansixiyo xeerka wuxuu noqonayaa sharci lagu dhaqmo. Xeerarku badanaa wey ka khaasesanyihiin sharciga. Tusaale ahaan, sharciga Minnesota wuxuu ka koobanyahey sharraxaad guud oo ku saabsan naafada, laakiin u qalnaanshaha cabirka khaaska ah

ee noocyada naafada waxaa laga heli karaa xeerarka gobolka.

Scale:	Cabbir/miisaan: Waxaad fiirisaa imtixaanada. Imtixaanada badanaa waxaa loo qeybiyaa laba darajooyin. Tusaale, imtixaano badan oo qaraada ahi waxay leeyihiin laba darajo. Mid cod karnimada ah iyo mid darajada heer sare, maxaa yeeley ardeygu wuxuu sameynayaa waxyaabo inuu afka ka dhihi lahaa.
School social worker:	Adeegaha bulshada ee dugsigu: Adeegaha bulshada ee dugsigu waxa uu qabtaa waxyaabo fara badan uu ku caawinayo ardeyda iyo waalidiinta. Waxay sameeyaan la talin, waxay baraan khibrado fiican, waxay caawiyaan ardeyda iyo qoysaska u baahan raashin iyo dhar. Waxaa kaloo laga yaabaa inay tijaabooyin ka qaadaan ardeyga taas oo la xiriira habka waxbarashada. Waxa kaloo ay u shaqeeyaan sida adeegaha bulshada ee deegaanka, ilaalinta ilmaha, ama bileyskaba, iwm.
Scout:	Gurguurasho/xamaarasho: Waa marka qofku ku socdo xamaarashada isaga oo fadhiya ama jiifa, waxay lamid tahey gurguurasho.
Screening, screening test, screener:	Imtixaan hor dhac ah/imtixaan lagu ogaanayo heerka ardeyga: Waa hab kooban oo ku siineysa qiyaasta ardey. Aad sax -hoose uma aha sida imtixaanka waxbarashada gaarka ah. Waxaa la qabtaa marka ardey la doonayo in la ogaado inuu diyaar u yahey in uu billaabo dugsigu.
Seclusion:	Xeyndaab: Waa meel fasalka kamid ah oo degan ama aan qeylo laheyn. Waxay noqon kartaa meel gees ah oo fasalka ka mid ah oo kursi yaallo. Xeyndaab waa meel uu ardeygu tagi karo/karto markuu dareemo inuu u baahanyahey meel degan, ama baraha ayaa ardeyga u dira markuu dabeecad xumi la yimaaddo. marka la doonayo in wax la xayiro ama qof loo xendaabay sabab dabeecad awgeed waa in loo sheego ardeyga waxbarashada gaarka ah.

Seizure, seizure activity, seizure disorder:	Suuxitaan, suuxid: Maskaxda caadiga ah waxaa wararka isgaarsiya koronto ama danab dhexraaca xididdada. Suuxiddu waa marka la kala gooyo danabka ama korantada, hadba sida iyo inta uu kala go'o ayuu u leegyahey. Waxaa laga yaabaa in qofku murqaha gacantu ay shaqeyn waayaan ama ay miyir beelaan oo ay kala garan waayaan haddii ay maanka beelaan. Waxaa kaloo jira suuxitaanno kale oo badan.
Self-advocacy skills:	Xirfadda qofku uu leeyahay: Awoodda aqoonta uu qofku u leeyahey waxa uu qaban karo iyo waxa uu u baahanyahey iyo in uu u sharrixi karo dadka.
Self-care skills:	Xirfadda is daryeelka: Waxay la mid tahey khibraddaha qof ahaaneed ee qofku leeyahay si uu u sameeyo waxa u wanaagsan.
Self-help skills:	Xirfadda caawimaadda naftaada: Waa waxa ay dadku sameeyaan si ay naftooda u caawiyaan. Sida qubeysiga, shanleysiga, iyo cadeysashada, iwm.
Sentence:	Odhaah dheer/jumlad, weedh: Waa koox erayo ah oo sharraxa fikrad, lehna magac iyo fal.
Sentence production:	Soo saaridda odhaah/weedhaha: Awoodda qorista odhaah buuxda.
Service:	Adeeg: Guud ahaan waxaa loo isticmaalaa sharraxa, daaweynta, iwm, kaas oo carruurta naafada ah la siiyo.
Service coordinator:	Agaasimaha adeegga: Waa qofka u qaabilsan inuu maamulo adeegga IFSP ama IEP iyo la xiriirka waalidiinta. Ereyga "agaasimaha adeegga" waxaa la isticmaalaa marka ilmuhu uu ka helayo adeeg haya'ado kala duwan dhexdooda.
Setting:	Bay'ada la fariisto: Meesha uu ilmaha naafada ahi wax ku barto. Tusaale, fadhiisimuhu waxaa uu noqonkaraa fasal caadi ah, ama fasal waxbarashada caadiga ah, ama dugsi waxbarashada gaarka ah.
Severe:	Daran/culus: Waxaa loo adeegsadaa si loo tilmaamo ardeyga ugu naafada culus. Ardeydaasi badi ma noolaan karaan haddaan kali loogu deegin.
Severe emotional disorder (SED)::	Dareen waxyeelo qaba oo daran: Waxa ay la mid tahey E/BD laakiin aad loo saarey muhiimmada xagga caafimaadka, aanse xooga la saareyn dhinaca dabeecada.
Short term memory:	Xusuus gaaban: Awoodda xusuusiga waxyaabo dhawaan dhacey, xusuusta macluumaadka cusub.

Sight words:	Erayada aragtida lagu garto: Erayada caamka ah ee ardey ka garan karo sharraxa tirada xarfaha, iwm. Ardeydu uma baahna inay ku furfuraan erayada maskaxda ee waa inay arragga ku fahmaan.
Sign, sign language:	Summad/calaamad/afka midaaridda/afka dhagoolaha: Waa af kusalaysan midaarid ama dhaqdhaqaaqa gacmaha iyo jirka oo loo adeegsado ama ay adeegsadaan dadka dhagaha la'.
Simple directions:	Tilmaamo fudud: Tilmaamo gaaban oo 1 ama 2 tallaabo leh. Tusaale, qaad dhagaxaa oo dul dhig miiska.
Skill:	Xirfad: Lahaanshaha awood aad wax gaar ah ku samayn karto. Xirfaddu way ka koobantahay ama ka uruursantahay awoodda iyo baaxadda, iwm.
Social adjustment:	La qabsi bulsho: Barashada xeerarka bulshado meel deggan iyo barashada sida loola dhaqmi karo, loola qabsan karo ama loola jaan qaadi karo dadka. La qabsiga bulshado waxay wax tar u leedahay ardaydu markay u guuraan ama ay tagaan dugsi cusub ama dal cusub.
Social /emotional ability:	Bulshaynimo/kartida dareenka laab lakaca: Karti u yeelashada dareenno habboon. Inaad si aad ah dareenkaaga u sheegto.
Social interaction:	Dhax gal bulshaynimo: La sheekaysi, la dhaqan, ama la xiriir dad kale.
Spastic (adjective), spasticity (noun):	Muruq adkaansho (tilmaame), muruq adag (magac): Murqaha oo adkaada xilli gaaban, ama si joogto ah, murqo adaygaas oo iskiis u adkaanaya lana celin karin. Waa tilmaan ka mid ah tilmaamaha curyaanimada jirka, sida Cerebral palsy.
Special education coordinator:	Isku xireha waxbarashada gaarka ah: Qof kor meera shaqaale, xiriiriyana barnaamijyada waxbarashada gaarka ah ee dhismayaal dhowr dugsi ama barnaamijyo dad naafo ah loogu tala galay ee dagmadoha. Isku xirayaashu waxay u shaqeeyaan horwadeennada (madaxda) waxbarashada gaarka ah.
Special education director:	Maareeyaha waxbarashada gaarka ah: Maamule dugsi oo u xil saaran waxbarasho gaar ah ee dugsi ama madax uga ah waxbarashada gaar ah dhowr dugsi-degmooyin.
Specific learning disability (SLD):	Waxbarasho naafo oo gaar ah: Xaalad qof fahmo iyo garasho ama caqli caadiya leh uu leeyahay, hasayeeshee ay ku adagyihiin akhris, qooral, ama hadal. Dhibaatooyinkan waxaa dhaliya habka qofku macluumaadka u sawirto (sida aragga ama maqalka), sida ay maskax dooda ama xusuustooda ay ugu

kaydiyaan macluumaad, iyo sida ay dib ugu soo celiyaan ama ugu xusuustaan warka ama macluumaadka ay maqlaan ama arkaan.

Specialist:	Xeel dheere, mutakhasis: Qof ku xeel dheer ama aqoon dheeraad ah u leh maaddo gooni ah.
Speech/language clinician, speech/language pathologist:	Hadal/dhakhtar luqo, hadal/luqo daaweeye: Qof ku xeel dheer hadalka iyo siday carruurta u barato hadalka, qofkaas oo loo tababaray inuu indha indheeyo ama qiimeeyo hadalka dadka qaba dhibaatooyin hadal iyo luqo ama af. Qofkani wuxuu daaweeyaa carruurta aan hadalka iyo luqada awoodi karin ama cillad ka qaba hadalka iyo luqada. Daaweeyayaalka cilladda hadalka iyo luqada waxay intooda badani haystaan shahaado sare.
Speech/language disorder:	Cillad hadal/ luqad ama af (hadal/luqad daciif ah): Waa magac guud oo la siiyo koox naafo ah oo dhibaato ku qaba ku hadal iyo ku sheekaysi ama ku wada hadal luqad. Cilladaha hadalka ama afka waxaa loo qaybiyaa 4 nooc: hadal qeexan/gubdin hadal/hadal cad oo la garan karo, af si fiican ugu hadlid, cod iyo af.
Splint:	Muruq xajiye/muruq caawiye: Waa qalab caafimaad oo ay dadku ku xiraan gacmohooda ama lugohooda, si ay muruqohooda ugu hayaan meel gaar ah.
Stamina:	Awooda jirku iskaga celiyo cudurada: Xoog ama adkaysi awood loo yeelanayo shaqo ama ciyaaro xili ama muddo badan ayadoon la'daalayn.
Standard deviation:	Heer beeg ka baydh: Fiiri ama eeg ka baydh <u>deviation</u>
Standard error of measurement (SEM):	Qalad heer beeg cabbir: Imtixaanna 100% sax ma aha. Tiro koobayaashu waxay xisaabiyaan celceliska inta uu imtixaan qalad ku imaan karo. Sidaas darteed, tusaale, natiijada imtixaan waxay u dhanaysaa ardayga natiijadiisu waxaa weeye 78 lagu daro lagana gooyo 3 qalad heer beeg cabbir ku yimid. Taasi waxay ka dhigan tahay natiijada saxda ah waxay noqon kartaa 81 (+B) ama 75 (-3).
Standard score:	Natiijo heer beeg/natiijo la dhaqameeyay ama la caadeeyay: Natiijada imtixaan tiro ahaan, taas oo tilmaamaysa sida arday loogu barbar dhigo arday kale kuna salaysan qiyaasta la qabatimay. Natiijada la

cadeeyay uma dhigna inta jawaabood ee saxda ah.

Standardized test:	Imtixaan la dhaqameeyay ama la caadeeyay/Imtixaan isku-hab ah: Qalab loogu talagalay in lagu qiimeeyo laguna cabbiro xirfadaha ama kartida qaar kood, ka dibna natiijada soo baxda la daaboco. Imtixaanadani waa inay yeeshaan ansax ahaansho iyo sugnaan (fiiri hoos). Imtixaanaadka isku-habka lagu saleeyay loogu talagay inay galaan ama ay qaataan caruur tira badan oo ka kala timid dhammaan Maraykanka.
Stimulus (singular), stimuli (plural):	Dareen kiciye: (kali) Dareen kiciyayaal (wadar): Wax dhaliya fal ama fal celin. Tusaale, xeel dheeraha maqaalku wuxuu sameeyaa qaylo dheere, ilmuhuna wuu ooyaa. Qayladu waa dareen kiciye, oohintuna waa natiijada ka dhalatay qaylada. Tusaale kale, George wuxuu foorjeeyay, ama caayay Sally, Sally-na George ayay wax ku dhufatay. Foorjaynta George waa "dareen kiciye" kudhufashaduna waa "jawaab calin." Erayga "dareen kiciye" waxaa kale oo loo adeegsadaa imtixaanka. Tusaale, dhakhaatiirta ku xeel dheer afka iyo hadalka waxaa dhici karta inay ilmo tusaan dhowr sawir ayna waydiiyaan ilmaha inuu sheego sheeko. Sawirada waxaa lagu magacaabaa "dareen kiciye"
Strength:	Awood/karti: Waxyaalaha uu qofku si fiican u sameeyo ama uu si fiican u yaqaanno.
Subtests:	Imtixaan hoosaad: Qayb ka mid ah imtixaannada oo cabbira qayb yar oo ka mid ah meesha wal-walka laga qabo. Tusaale, imtixaan akhris ah waxaa ku jiri kara imtixaan hoosaad sida garashada xarfaha, isku aaddinta codka iyo xarfaha, kicinta iyo fahamka.
Superintendent:	Maareeye/maamule guud: Agaasimaha dugsi degmo ee magaalo.
Surrogate parent:	Ilme loo dhiibe/ilmu mas'uul ka noqde: Qof dugsigu u magacaabay inuu noqdo waalidka sharciga ah ee arday, uuna uga noqonayo waalid sharci ah asaga oo uga qayb galaya shirarka qiimaynta waxbarashada gaarka ah iyo kulamada IEP. Qofkan waxaa la siiyaa qoraal uu ku oggolaanayo inuu mas'uul ka noqdo. Arrintan waxaa la sameeyaa marka ardaygu uunan lahayn waalid, ama haddii waalidku uuna joogin. Tusaale, haddii uu waalidu uu xiran yahay ama haddii waalidku si sharci ah ilmaha uwareejiyo ayna waydiiyaan qof kale inuu ilmahooda waliid uga noqdo. Way dhici kartaa Ilmuhu wuu inuu la noolaado ama

uuna la noolaan ilme loo dhiibe ama ilme mas'uul kanoqde. Sidaas darted, ilme loo dhiibe la mid ma aha ama wuu ka duwan yahay ilme koriye.

Syndrome:	Aafo: Calaamado koox ah oo lagu garto cudur ama dhibaato caafimaad.
Tactile sign language:	Saamaynta dereenka taabashada ee calaamadaha afka dhagoolaha: Nooc afka ama luqadda dhagoola yaasha lugula hadlo ah taas oo lagu wada xiriiro ama lagu wada hadlo taabasho. Noocan afka la isku midaaro ah waxaa loo adeegsadaa dadka indhaha iyo dhagaha la'.
Target behavior:	Dabecadda labeegsanayo/dabecadda larabo/akhlaaqda larabo: waxa barayaasha ama macallimiinta iyo waalidiintu ay karabaan ardaygu inuu sameeyo.
Test:	Imtixaan: Koox waydiino ama su'aalo ah oo loo qaabeeyey inay muujiyaan xirfado guud. Tusaale, imtixaanka akhriska, xusuusta, dhagaysiga, kaska ama fahamka iyo wixii lamid ah. Imtixaanada waxbarashada gaarka ah waxaa gooni loosiiyaa (hal arday markiiba) waxayna qaadataa xilli aad u dheer. Imtixaanada waxaa loo qaybiyaa imtixaan hoosaadyo ama qaybo yar-yar. Imtixaanada qaarkood, imtixaan hoosaadka waxaa la isugu geeyaa ama loo kooxeeyaa cabirro kaas oo imtixaanka kadhigaya mid dhamaystiran. Markaad imtixaan hoosyaadyada oo dhan isu gayso, waxaa lagu magacaabaa "test battery."
Testing of limits:	Heerka uu imtixaanku ku egyahay/halka uu imtixaanku ku egyahay: Tani waxay tixraacaysaa qaabab kala duwan oo ay cilmi-nafsiga dadka yaqaanna ama dadka cilmi-nasiga bartay, dhakhaatiirta hadalka, ama macallimiinta waxbarashada gaarka inay badalaan maamulka imtixaanka isku habka ah. Tusaale, aqoon yahannada nafta (cilmi-nafsiga) waxaa dhici karta inay xilli dheeraad ah oo looga jawaabo siiyaan su'aalaha qaarkood, ama ay siiyaan ardayga fursad labaad uu su'aasha ugaga jawaabay afkii uu u dhashay ama ay u dhalatay. Ujeedooyinka qaabab kan ah waxaa loogu

talagalay in ardayda looga magdhabo eexashada afka ama dhaqanka iyo in lasiiyo ardayga fursad kasta si uu utuso kartidiisa ama kartideeda.

- Therapy:** **Daawayn:** Daawayn lagu saxayo dhibaatooyin ducur oo ah, mid muuqaalka (physical) ah ama mid dareenka (emotional). Tusaale, dhakhaatiirta daaweeya hadalka.
- Tic:** **Dubaaxis/Bood-boodka murqaha:** Dhaqdhaqaaq ikhtiyaar la'aan ah oo ay murquhu sameeyaan oo (lagu magcaabo a "motoric tic") ama cod ikhtiyaar la'aan oo ay dadku sameeyaan kaas oo lagu magacaabo ("vocal tic"). Fiiri meesha ay ku qorantahay Tourette Syndrome si aad wax dheeraad ah uga ogaato cudurka dubaaxiska.
- Time-out:** **Bannaan u saarid/Fasal ka saarid:** Ardayga leh cillado dabeeco xumo oo amin yar laga saaro fasalka si uu usoo dego am u soo xalliyo.
- Time-out room:** **Qolka la isku dajiyo/maskaxda lagu nasiyo:** Qol gooni ah oo amin yar (xili gaaban) lageeyo ardayda qabta cillado dabeeco si uu isu dajiyo ama ay isu dajiso. Waxaa waajib ah in si faahfaahsan loogu qeexo qorshaha waxbarasho ee ardayda loogu talagalay ee loo soo gaabiyoo IEP marka la adeegsanayo ama arday loo dirayo qolka la isku dajiyo (maskaxda lagu dajiyo). Waxaa waajib ah in qolalka is dajintu ay leeyihiin daaqaad si ay shaqaaluhu ardayga u ilaaliyaan, ayna u habsadaan inay nabad yihiin. Ardayda xilli dheer laguma hayn karo qolalka la isku soo dajiyo, loomana diidi karo inay musqusha aadan ama ay cunto cunaan ama ay biyo cabaan.
- Toileting:** **Saxaraysiin/Musqul gayn:** Waa eray loo adeegsado marka dirqi (khasab) kutahay dadka waawayn (qaan gaarka ah) inay ilmo musqusha geeyaan maxaa yeelay ilmuhu kaligii ma aadi karo. Sidoo kale waxaa eraygan loo adeegsadaa marka ay ardayda dhibaato ama cudur kaqabta jirka kuwaas oo aanan joojin karin ama aan xakamayn karin kaadi haystoda ama mindhicirkooda. Tusaale, "Cabdi wuxuu u baahan yahay kaalmo musqul gayn."

Tourette's syndrome:	Aafada Tourette: Waa cillad maskaxda dadka kaga dhacda taas oo tilmaanteedu tahay inuu qofku sameeyo dhaqdhaqaaq murqo oo ikhtiyaar la'aan ah (tics), cod ama erayo (hadal) aan la joojin karin (cod aan la xakamayn karin) oo loo yaqaano “vocal tics”.
Transition:	Xilli kalaguur ah: Lahaanshaha xirfado, kuwaas oo ardayda u diyaariya nolosha qaangaarka: xirfadaha shaqada, xirfadaha gooni u noolaanshaha, xirfadaha madadaalada iyo, iwm.
Transportation:	Gaadiid: Gaynta ardayda dugsiiga lagaynayo ayada oo laga soo qaadayo guriga iyo ku soo celinta ardayda gurigooda. Ardayda naafada ah waxay u baahnaan karaan gaadiid gaar ah.
Trauma:	Eel, Balaayo xun: Dhacdo xun, dhibaato culus, taas oo ku keenta qofka ay kudhacdo xanuun daran oo kaga dhaca dareenka, nafta iyo waliba jirka.
Traumatic brain injury (TBI):	Eel/xanuun maskaxda ku dhaca: Waa dhaawac kasta oo maskaxda ku dhaca, kaas oo keena ama sababa dhibaatooyin la xiriira waxbarashada ama waxqabadka maalin kasta. Qofka uu cudurkani ku dhoco, waxbarasho iyo inuu shaqo qabto labaduba waa ku dhib sababtoo ah maskaxda ayuu dhaawac kasoo gaaray.
Traumatized (adjective):	Eelan/Xanuun maskaxeed qaba (sifo): Waa eray loo adeegsado in lagu qeexo qof aad u carooday (aad u xanaaqay) oo aad u argagaxsan sababtoo ah dhibaato xun ayaa ku dhacday, eel “trauma”.
Travel training:	Tababbar safar: Waa tababbar safar oo u eg kan hanuuninta (orientation ka) iyo kan lagu barto sida si deg-deg ah wax la isugu duba rido oo la isugu keeno (mobility training). Hasayeeshee tababbarka safarku wuxuu soo saaraa barashada sida loo helo ama loo tago meelaha guud (public places), sida loo raaco gaadiidka dadwaynaha (buses) iyo wixii lamid ah.
Utterance:	Hadal/Hadaaq: Waa koox erayo ah oo lagu hadlo oo macno leh. Hadaaqu qasab ma aha inuu naxwo ahaan noqdo odhaah dhamaystiran, hasayeeshee wuxuu kadhiganyahay fikrad (aragti) dhammaystiran.
Valid (adjective), validity (noun):	Ansax (sifo) Ansax ahaansho (magac): Waa eray farsamo oo kadhigan inuu imtixaanku sax yahay, uuna cabbiro waxa loogu tala galay inuu cabbiro. Tusaale, maaddooyinka afka laga sheego oo ku saabsan imtixaanka garashada ma waxay cabbiraan garashada mise aqoonta Afka Ingiriiska? Ardayda ELL ka maku habboontahay?

Verbal ability:	Karti hadal: kartida afka (luqadda) lagu adeegsado, in garaad badni (caqli badni) lagu muujiyo afka (luqadda aad ku hadlayso).
Verbal expression (oral expression):	Hadal caddayn/dareen hadal (dareen hadal ahaan ah, hadal tacbiir ahaan ah): Kartida hadal ahaan loogu gudbiyo aragtidaada, yeelashada karti aad aragtidaada hadal ahaan aad ku gudbinayso (afka lagu hadlo).
Verbal reasoning:	Hadal aragti ku salaysan: Kartida aad uleedahay inaad xaliso dhibaatooyin adiga oo adeegsanaya erayo ama hadal (dhagaysi ama hadal)
Vision:	Arag/Aragti: Kartida aad uleedahay inaad wax aragto.
Visual acuity:	Arag fiiqnaan/Arag fiicnaan: Sida qof si sax ah wax ugu arko.
Visual discrimination:	Arag sooc: kartida lagu kala sooco qaabka ama muuqaalada iyo xarfaha kaladuwan.
Visual memory:	Xusuusta aragga: Kartida lagu xusuusto wixii la arkay.
Visual processing:	Arag habayn: Kartida wax lagu arko, laguna garto wuxuu yahay.
Visually impaired (VI):	Arag dhiman/Arag yari: Qof cillad aragga kaqaba oo aan cilladana lagu hagaajin karin muraayado la xirto (Qof ka markii uu muraayado xirto si fiican wax u arka laguma tirin karo inuu yahay arag dhimane (cilladdan waxaa afka Ingiriiska loogu soo gaabiyay (VI).
Vocal mechanism:	Wada shaqaynta qaybaha kala duwan ee codka/hadalka: Afka iyo qaybaha kale ee jirka ee hadalka soo saara.
Vocational training, vocational skills:	Tababar xirfadeed: Xirfado loo baahan yahay in lagu qabto shaqo gooni ah.
Voice disorder:	Cod kala jeeda/cod xumaada: Nooc hadal ah/af (luqad) ah oo kala jeeda oo codka qofku aad u xabeebsanyahay, hooseeyo, ama oo si kale u duwan yahay (si kale u badalan yahay). Codka xumaada waxaa inta badan sababa dhibaato (xanuun) ku dhaca cod mareenka qofka ee dhuunta.
Voice-activated:	Cod la kiciyay/cod la dhaqaajiyay: Waa makiinad (mashiin) markii uu qof wax yiraahdo is daaraysa. Tusaale, qofka qalaka qaba waxaa dhici karta inuu raadiye (radio) wato, kaas oo is daaraya marka uu qofku wax dhaho.
Volume:	Heerka maqalka: Qaylo, qaylo dheer, dhawaaq dheer (waa marka laga hadlayo arrimaha maqalka).

Walker:	Siiqo/lagu socde/lagu tukube: Waa bir 4 lugood leh oo uu qofku u adeegsan karo inay kacaawiso socodka.
Weakness:	Liidasho/ku liita/aan kufiicnayn: Waxyaabaha uunan qofku ku fiicnayn.
Wheelchair:	Gaari curyaan: Waa kursi lugo leh oo raaxo leh kaas oo loo sameeyey qof aan socon karin.
Withdrawn:	Is kaliyayn/dadka ka dhex bixid: Waxay tilmaamaysaa arday aanan rabin inuu dhex galo dad kale, ardaygan oo ah mid aamusan oo cabsanaya, oo murugaysan.
Word identification:	Eray Aqoonsi: Inaad awood uyeelato inaad isku aaddiso xarfaha iyo dhawaaqa iyo higgsaadda erayada. Ardeyga naafada ah (waxbarashada naafo ku ah, ee caqliga lagaga jiro) waxaa dhici karta inuu isku aaddiyo dhawaaq iyo xarfa aan is lahayn, ama waxaa dhici kara inuu arko oo kaliya sadaro isku qasan oo bogga ku yaala, hasayeeshee uunan aqoonsan karin (arki karin) xarfaha ama erayada.
Word production:	Eray soo saarid: Inaad awood u yeelato inaad dhahdo (akhrido) ama qorto erayo dhamaystiran.
Word recognition:	Eray garasho: Awoodda aad u leedahay inaad higgsaadiso oo aad kasto (fahamto) macnaha erayga.
Written expression:	Qoraal: Sheegid ama gaarsiin aad aragtidaada ku gudbinayso (ku sheegayso) qoraal ahaan.